## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

### WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA

## GOLAHA MIHNADLEYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA (GMCQ)

*Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada 2017*

# Tusmo


QODOBKA 1aad ........ 1

Ujeeddada Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) ........ 1

QODOBKA 2aad ........ 2

U-Qalmidda Xubinnimada Golaha ........ 2

QODOBKA 3aad ........ 2

Magacaabidda Xubnaha Golaha ........ 2

QODOBKA 4aad ........ 3

Heerarka iyo Xuquuqda Xubinnimada ........ 3

B. XUBNAHA (Members) ........ 3

T. La-wadaage (Partner) ........ 4

T.1. Xuquuqda Shurakada ........ 4

J. Xiriir-wadaag (Associates) ........ 4

QODOBKA 5aad ........ 5

Tirada Golaha ........ 5

QODOBKA 6aad ........ 7

Awoodaha iyo Xilalka Golaha ........ 7

QODOBKA 7aad ........ 7

Waayidda Xubinnimada Golaha ........ 7

QODOBKA 8aad ........ 8

Dhammaadka Xubinnimada Golaha ........ 8

QODOBKA 9aad ........ 8

Guddiga Fulinta ........ 8

QODOBKA 10aad ........ 9

Awoodaha iyo Xilalka Guddiga Fulinta ........ 9

QODOBKA 11aad ........ 9

Kulamada Guddiga Fulinta ........ 9

QODOBKA 12aad ........ 10

Kulamada Iyo Go'aannada Golaha ........ 10

QODOBKA 13aad ........ 10

Guddiyada Kale Ee Gaar Ahaaneed ........ 10

B. Guddiga Cilmi-baarista Caafimaadka: ........ 10

T. Guddiga Anshaxa Mihnadleyaasha: ........ 11

J. Guddiga Qiimeynta Mihnadleyaasha: 11
QODOBKA 14aad 11
Cilmi-baarista Caafimaadka 11
QODOBKA 15aad 12
Abuuritaan Maktabad Asaasi ah ee Golaha 12
QODOBKA 16aad 12
Dhaqaalaha Golaha Iyo Ilaha Laga Helayo 12
QODOBKA 17aad 12
Isticmaalka Dhaqaalaha Golaha 12
QODOBKA 18aad 13
Xiriirka Iskaashi ee Golaha 13
QODOBKA 19aad 14
Khidmado 14
QODOBKA 20aad 14
Diiwaan-gelinta, Rukhsad-siinta iyo Ansixinta 14
QODOBKA 21aad 15
Diiwaan-gelinta Mihnadleyaasha Caafimaad 15
B- Codsi Diiwaan-gelin 15
T- Joojinta hawl-galka Mihnadleyaasha aan diiwaan-gashanayn 15
QODOBKA 22aad 16
Shuruudaha Diiwaan-gelint ee Mihnadleyaasha Caafimaad 16
QODOBKA 23aad 16
Heerarka Diiwaan-gelinta 16
B. Diiwaan-gelin Ku-meel-gaar ah 16
T- Diiwaan-gelin Buuxda 17
J. Diiwaan-gelin Takhasusle 18
QODOBKA 24aad 19
Beddelaadda Macluumaad 19
QODOBKA 25aad 19
Kala-noqoshada Diiwaan-gelinta 19
QODOBKA 26aad 20
Ka noqoshada Diiwaan-gelin Shahaado 20
QODOBKA 27aad 20
Dib-u-diiwaan-gelin 20

QODOBKA 28aad ... 21
Nuqul Sameyn Shahaado Diiwaan-gelin ... 21
QODOBKA 29aad ... 21
Diiwaan-gelinta Mihnadleyaasha Caafimaadka Shisheeye ... 21
B- Diiwaan-gelin Kumeel Gaar ah ... 22
T- Diiwaan-gelin Xadidan ... 23
QODOBKA 30aad ... 24
Xad-Gudubyada Ka Yimaada Mihnadle Caafimaad ... 24
B) Mihnadlaha Diiwaan-gashan: ... 24
QODOBKA 31aad ... 25
Diiwaan-gelinta Xarun Caafimaad ... 25
QODOBKA 32aad ... 25
B- Joojin Hawl-qabadka Mihnadlaha aan Rukhsad lahayn ... 25
T- Codsi Rukhsadda Hawl-qabad ee Mihnadle Caafimaad ... 26
QODOBKA 33aad ... 26
Cusboonaysiin Rukhsad Hawl-qabad ... 26
QODOBKA 34aad ... 27
Muujin Rukhsadeed ... 27
QODOBKA 35aad ... 28
Kala-noqosho Rukhsad ... 28
QODOBKA 36aad ... 28
Rukhsad-siin Xarun Caafimaad ... 28
B- Shaqo-ka-joojin Xarun Caafimaad oo aan Lahayn Rakhsad ... 28
T- Codsi Oggolaansho Hawl-gelin Xarun Caafimaad ... 29
QODOBKA 37aad ... 29
Cusboonaysiin Rukhsad Xarun Caafimaad ... 29
QODOBKA 38aad ... 29
Diidmo Bixin Rukhsad Xarun Caafimaad ... 29
QODOBKA 39aad ... 30
Baarista Rug Caafimaad ... 30
QODOBKA 40aad ... 31
Xiritaan Xarun Caafimaad ... 31
QODOBKA 41aad ... 32
Ansixinta Xarun Waxbarasho Caafimaad ... 32

QODOBKA 42aad ..... 34
Ansixinta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad ..... 34
QODOBKA 43aad ..... 35
Qiimeynta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad ..... 35
QODOBKA 44aad ..... 35
Dib-u-eegidda Barnaamijta Waxbarasho oo Horay loo Ansixiyey ..... 35
QODOBKA 45aad ..... 36
Ansixinta Adeeg Daryeel Caafimaad ..... 36
QODOBKA 46aad ..... 37
Cusbooneysiin Ansixin ..... 37
QODOBKA 47aad ..... 38
Kala-noqosho Ansixin ..... 38
QODOBKA 48aad ..... 38
Shahaadooyinka Waxbarasho ee Shisheeye ..... 38
QODOBKA 49aad ..... 38
Aqoonsiga Ururrada Mihnadleyaasha Caafimaadka ..... 38
QODOBKA 50aad ..... 39
Xayeysiin ..... 39
QODOBKA 51aad ..... 40
Ilaalinta Hor-gelin Magac ..... 40
QODOBKA 52aad ..... 41
Xakamaynta Adeegsiga Mansabyada Takhasusle ..... 41
QODOBKA 53aad ..... 42
Xeer-hoosaadyo iyo Xeer-nidaamiyeyaal ..... 42
QODOBKA 54aad ..... 42
Kala-diridda Golaha ..... 42
QODOBKA 55aad ..... 43
Xarunta Golaha, Xafiisyada Gobolada iyo Degmooyinka ..... 43
QODOBKA 56aad ..... 43
Wax-ka-beddelid Xeer ..... 43
QODOBKA 57aad ..... 44
Racfaanno ..... 44
QODOBKA 58aad ..... 44
Warbixin-sanadeed ..... 44

QODOBKA 59aad .......... 44
Joojin Mihnad Caafimaad .......... 44
QODOBKA 60aad .......... 44
Baabi'in .......... 44
QODOBKA 61aad .......... 45
Dhaqan-gal .......... 45
QODOBKA 62aad .......... 45
Qeexid .......... 45

# QODOBKA 1$^{aad}$
## Ujeeddada Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ)

Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) waa gole madax-bannaan oo leh sifo-qaanuuneed marka uu gudanayo xilalkiisa iyo waajibaadkiisa la xiriira hawlaha loo idmaday, taas oo ay bud-dhig u tahay in uu ka ilaaliyo bulshada waxyeellada ka soo gaarta ku xadgudbidda hawl-galada caafimaadka, iyo in uu horumariyo anshaxa iyo xushmadda u dhexeysa heerarka Mihnadleyaasha caafimaadka ee Soomaaliya.

Ujeedooyinka gaar-ahaaneed:

1. Diiwaan-gelinta iyo rukhsad-siinta Mihnadleyaasha caafimaadka iyo xeer-nidaaminta hab-dhaqankooda mihnadeed;
2. Siinta rukhsado xarumaha adeegyada caafimaadka ee mudan oo bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka;
3. Aqoonsi-siinta  xarumaha waxbarashada caafimaadka ee soo saara kaadirka caafimaad;
4. Meel-marinta ama joojinta manaahijta iyo barnaamijyada tababarada caafimaadka ee kala duwan.
5. Xaqiijinta bad-qabka iyo tayada adeegyada caafimaad ee la siiyo bulshada Soomaaliyeed.
6. Fududeynta dhismaha Golayaal u gaar ah mihnadaha caafimaadka ee kala duwan kuwaas oo leh mid kasta xeer u gaar ah, faracna ka noqon doona Golaha guud ee MCQ. Golayaashaas waxaa kamid ah mid Takhaatiirta iyo Ilkaha, Ummunlisooyinka, Kalkaaliyaasha iyo Mihnadaha kale ee kala duwan.

## QODOBKA 2$^{aad}$
## U-Qalmidda Xubinnimada Golaha

Shuruudaha ugu yaraan looga baahan yahay qofka xubin buuxda ka noqonaya GMCQ waxay yihiin:

1. Muwaadin Soomaali ah, degan Soomaliya kuna leh cinwaan rasmi ah.
2. Leh dhaqan suuban, xushmad- sarena ku dhex leh bulshada Soomaaliyeed, iyo aragti sare oo xambaarsan daacadnimo.
3. Leh ugu yaraan shahaadooyinka aqooneed ee looga baahan yahay Mihnadleyaasha caafimaad. Sidoo kale, Mihnadleyaasha ka baxsan caafimaadka waa in ay leeyihiin shahaadooyin meel-mar ah ee qeybaha muhiimka u ah bulshada ee maadooyinka la xiriira caafimaadka.
4. Waa in uusan lahayn fal-dembiyeed ay si kama-dambays ah maxkamadi ugu xukuntay ama aan ahayn eedeysane sugaya maxkamad dalka gudihiisa ama dibaddiisaba;
5. In uusan si muuqata ugu jirin arrimo muujinaya hawlaha khuseeya ganacsiga iyo wixii kale ee la xiriira nooc kasta oo ay yihiinba oo saameyn lid ah ku yeelan kara ama abuuri kara isku-dhac danaha Golaha; iyo
6. In uu oggolaado xubinnimada si xor ah oo uu mushaar la’aan uga mid noqdo xubnaha Golaha.

## QODOBKA 3$^{aad}$
## Magacaabidda Xubnaha Golaha

1. Hay’adaha, (ha ahaadaan hay’adaha dawladda ama kuwa gaarka ah) daneynaya kamid noqoshada Golaha waxay u soo magacaabanayaan musharixiintooda uga mid noqonaya Golaha iyadoo ansixinta ugu dambaysa uu gaarayo guddi loo idmaday in uu dhammeystiro xubnaha. Marka xubinnimada buuxda la oggolaado, xubintu waxay u hawl-galeysaa iyadoo wakiil ka ah danaha uu leeyahay Goluhu.
2. Guddiga ansixinta musharaxiinta waxaa soo magacaabaya marka ugu horeysa Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya si ay u ansixiyaan una dhammeystiraan Golaha guud ee Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka.
3. Shuruudaha xulashada xubinta Golaha ee loo baahan yahay in tixgelin gaar ah la siiyo waa:

a) Caddeymo sugaya aqoonta mihnadda caafimaadka;

b) Aqoon mihnadeed sare iyo Karti dheeraad ah;

c) Waayo-arragnimada mihnadda;

d) Naxariista iyo daacadnidmo sare ;

e) U-hoggaansanka anshaxa iyo akhlaaqda mihnadda iyo arrimaha dhaqanka suuban leh; iyo

f) Dhaqan iyo akhlaaq wanaagsan.

## QODOBKA 4aad
## Heerarka iyo Xuquuqda Xubinnimada

Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) wuxuu leeyahay saddex heer oo kala duwan oo mid walba leedahay kaalin iyo xuquuqo gaar ah:

**B. XUBNAHA (Members)**

Xubinnimada Goluhu waxay u furan tahay bahda Mihnadleyaasha Caafimaadka iyo Mihnadleyaasha kale ee la xiriira hawlaha caafimaadka. Xubnaha mudnaanshaha leh waxaa lagu oggolaanayaa marka uu codsiyadooda ansixiyo GMCQ, marka laga reebo madasha kowaad oo uu ansixin doona guddi si gaar ah loogu xilsaaray abuuridda GMCQ.

**B.1. XUQUUQDA XUBNAHA**

1. Xuquuqda cod-bixintu waxay gaar u tahay xubnaha;
2. Xubnuhu waxay u soo-jeedin karaan GMCQ qaraaro ku salaysan gudbinta habraaca si waafaqsan siyaasadda Golaha;
3. Si waafaqsan shuruuc kasta oo gaar ahaaneed, xubnuhu waxay xaq u leeyihiin warbixin kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb-qaataan hawlaha Golaha; iyo
4. Wixii kale oo warbixin ah ee uu hayo Goluhu, ha khusaysyo Golaha, xubin kasta, wadaag ama xiriir-wadaag, ama cid kale, waxaa lagu siin karaa xubnaha codsi iyo in Golaha tixgelin ahaan ay la qumanaato si ku aaddan rabitaankiisa gaar ahaaneed.

**T. La-wadaage (Partner)**

Ururku ha ahaado mid heer Qaran, mid ka dhexeeya dawlado badan ama mid leh aragti caalami ah waxna ku soo kordhin kara Golaha sida ka muuqata hawl-galkooda ku aaddan xeerarka caafimaadka oo ay kamid yihiin caddeymaha shahaadooyinka, qiimeynta iyo imtixaan-qaadidda, tayeynta waxbarashadda ama wixii kale ee la xiriira tayada iyo daacadnimada ee ku aaddan hawl-qabadka daawada oo si meel-mar ah looga filayo soo-kordhinta aragti gooni ah ama keenaya xeel-dheeri ku aaddan hal-abuurada Golaha ee shurakada GMCQ oggolaan doono marka uu meel-mariyo codsigiisa.

**T.1. Xuquuqda Shurakada**

1. Shurakada looma oggolaanayo in ay cod-bixin ka dhiibtaan kulanka Golaha;
2. Shurakada waxay u soo-jeedin karaan GMCQ qaraaro ku salaysan habraaca gudbinta si waafaqsan siyaasadda Golaha;
3. Shurakada waxay ka hawl-geli karaan guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo-hawleedka Golaha marka laga reebo Guddiga Fulinta;
4. Si waafaqsan sharciga, Shurakadu waxay mudan yihiin warbixin kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb-qaataan hawlaha Golaha marka laga reebo codeynta kulan kasto oo Guud ee Golaha; iyo
5. Wixii kale oo warbixin ah ee uu hayo Goluhu, ha khusaysо Golaha, xubin kasta, la-wadaage, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, waxaa lagu siin karaa la-wadaage codsi iyo in Golaha tixgelin ahaan ay la qumanaato si ku aaddan rabitaankiisa gaar ahaaneed.

**J. Xiriir-wadaag (Associates)**

Xiriir-wadaagta waxay u furan tahay urur kasta oo xiriir la leh Golaha oo ku aaddan hab-wanaagga xeer-nidaamintiisa ee mihnadaha daryeelka caafimaad oo kaabaya mihnadda caafimaad. Ururkii mudan waxaa loo oggolaanayaa in uu noqdo xiriir-wadaag marka uu codsigiisa meel-mariyo GMCQ.

**J.1. Xuquuqda Xiriir-wadaagta**

1. Xiriir-wadaagtu waxay ka hawl-geli karaan guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo-hawleedka Golaha marka laga reebo Guddiga Fulinta;
2. Xirrir-wadaagtu waa ka-qeyb-geli karaan Kulanka Guud ee Golaha ;
3. Xirrir-wadaagta looma oggola in ay ka codeeyaan Kulanka Guud ee Golaha, mana soo-jeedin karaan qaraaro;
4. Si waafaqsan shuruuc kasta oo gaar ah ama diidmooyinka sharciga ah, xiriir-wadaagtu waxay mudan yihiin warbixin kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay u suurta-geliso in ay si buuxda uga qeyb-qaataaan hawlaha marka laga reebo codeynta ama soo-jeedinta qaraarada ee Kulan kastoo Guud ee Golaha; iyo
5. Wixii kale oo warbixin ah ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, la-wadaage, xiriir-wadaag ama cid kale, waxaa lagu siin karaa xiriir-wadaagta haddii codsigooda ay Golaha tixgelin ahaan la qumanaato si ku aaddan rabitaankiisa gaar ahaaneed;

## QODOBKA 5aad
## Tirada Golaha

1. Goluhu wuxuu ka kooban yahay 15 (Shan iyo toban) xubnood oo loo qeybinayo Ururada Mihnadleyaasha Caafimaad, Wasaaradaha ay khusayso iyo jilayaasha kale ee daneynaya. Xeerkani wuxuu dhiirri-gelinahayaa in kaalin mug leh la siiyo dumarka mihnadleyaasha ah.

| Lr. | Hay'adaha (Wasaaradaha, Ururada, Machadyada, iwm) | Cadadka loo qoondeeyey |
|---|---|---|
| 1. | Wasaaradda Caafimaadka | 2 |
| 2. | Wasaaradda Tacliinta Sare | 1 |
| 3. | Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka | 1 |
| 4. | Ururka Dhaqaatiirta Soomaaliyeed | 2 |
| 5. | Ururka Kalkaaliyeyaasha Soomaaliyeed | 1 |
| 6. | Ururka Umulisooyinka Soomaaliyeed | 1 |
| 7. | Xarumaha Waxbarashada Caafimaadka | 2 |
| 8. | Ururka farsamayaqaanada Sheybaarka Soomaaliyeed | 1 |

| | | |
|---|---|---|
| 9. | Ururka Daawo-yaqaannada Soomaaliyeed | 1 |
| 10. | Ururka Fayo-dhawrka Soomaaliyeed | 1 |
| 11. | Adeegyada Caafimaad ee Gaarka loo leeyahay | 1 |
| 12. | Bulshada Rayidka Soomaaliyeed | 1 |
| | **Isugeyn** | **15** |

2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka waxaa magacaabaya Xubnaha Golaha (GMCQ).
3. Haddii uu bannaanaado xil (jago) xubinnimo ee Golaha, ruuxa buuxinaya waxaa lagu magacaabayaa muddo 4 (afar) toddobaad gudahood ah si uu u dhammeystiro inta ka harsan muddo-xilliyeedkaas.
4. Waxaa waajib ah in wargelin qoraal ah muddo 30 (soddon) maalmood ku siman loogu soo gudbiyo Guddoomiyaha ka hor inta xubin Golaha kamid ah aysan is-casilin.
5. Anshax iyo akhlaaq-xumida ay 2/3 ee Goluhu u arkaan in ay waxyeello ama culeys ku yahay magaca, sharafta iyo jiritaanka Golaha, qofka xubinta ah ee ku lug leh arrimahaas waa laga saarayaa Golaha, waana la bedelayaa.
6. Goluhu wuxuu yeelanayaa astaan iyo shaabbad u gaar ah oo lagu istiicmaalo ujeeddooyinka Golaha oo keliya.
7. Goluhu wuxuu u qoondeynayaa gunno-maalmeedka xubnaha Golaha oo ku jira xil-gudasho, Safar ama ka-qeyb-gal shir.
8. Xubinta Golaha waxay muddada xil-haynta xafiiska noqononaysaa 3 (saddex) sanadood, oo la cusboonaysiin karo xilli kale oo 3 (saddex) sanadood ah.
9. Dhammaadka muddada xil-haynta, xubintu way sii haynaysaa xilka xafiiska inta xubin kale laga soo magacaabayo, balse marna lama oggolaanayo muddo-kororsi dhaafsan 3 (saddex) bilood.
10. Xubnaha Goluhu waxay wadanayaan hawlahooda gaarka ah ee ka baxsan shaqada Golaha marka laga reebo waqtiga ay xubnuhu ku guda-jiraan xil-gudashada Golaha.
11. Looma oggola in xubini ay isla waqti qabato wax ka badan hal xil (mas'uuliyad).

## QODOBKA 6aad
## Awoodaha iyo Xilalka Golaha

1. Diiwaan-gelinta iyo rukhsad-siinta xubnaha leh aqoonta mihnadaha caafimaad iyo xeer-nidaaminta anshax-mihnadeedka ee hawl-wadeennada caafimaad.
2. Gacan-ku-haynta hannaanka habboon ee hawl-qabad oo ay wadaagaan hawl-wadeennada caafimaadka si waafaqsan mabda'a xeer-nidaaminta iyo dhiirri-gelinta caafimaadka bulshada.
3. Horumarinta habboon ee heerarka kala duwan ee shaqaalaha caafimaadka.
4. Dhiirri-gelinta jiritaanka iyo mansabka mihnadda caafimaadka iyo mas'uuliyadda lagu joojinayo adeegyada aan loo baahnayn ama laga maarmi karo gebi ahaan ama qeyb ahaan.
5. Rukhsad-siinta iyo aqoonsiga xarumaha caafimaad ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, sidoo kale hubinta tayada rugaha caafimaad, adeegyada caafimaadka la bixiyo iyo xarumaha waxbarasho ee bixiya aqoonta caafimaadka.
6. Golaha wuxuu matali karaa hawl-wadeennada caafimaad iyo kor-u-qaadista danahooda.
7. Baarista eedeynta iyo anshax-xumida mihnadeed iyo fulinta ciqaabaha ku habboon.
8. In laga hortago lagana caawiyo bulshada dhammaan hawlaha la xiriira adeegga caafimaad ee aan hufneyn.
9. Talo-siinta Wasaaradda Caafimadka, Wasaaradaha kale ee ay khusayso, bah-wadaagta caafimaadka iyo daneynayaasha arrimaha la xiriira mihnadda caafimaadka.
10. Fulinta dhammaan waxyaalahaas waa lama huraan iyo wax-qabadka hawlaha ku aaddan Xeerkan.

## QODOBKA 7aad
## Waayidda Xubinnimada Golaha

Ruux kasta oo laga helo qodobada hoos ku xusan, looma oggolaanayo in uu hayo xil uu leeyahay GMCQ:

1. Haddii uusan ahayn muwaadin Soomaali ah ama aanu haysan rukhsad uu uga hawl-galo Adeegga caafimaad;

2. Haddii magaciisa hore looga tiray diiwaanka Golaha;
3. Haddii lagu xukumay fal-dembiyeedyo ay kamid tahay anshax-xumo, islamarkaana soo dhammeystay shaqo ciqaabeed. ama
4. Haddii uusan dhimmir ahaan fayo-qab ahayn.

## QODOBKA 8aad
## Dhammaadka Xubinnimada Golaha

Xubinnimada Golaha waxaa jiritaankeedu dhammaanayaa haddii la helo arrimaha soo socda:

b) Xubinta oo xilka laga qaado si waafaqsan Qodobka 7aad;

t) Xubinta oo geeriyoota; ama

j) Haddii xubin aysan ka soo qeyb-gelin 3 (saddex) jeer oo isku-xigta kulamada Golaha iyadoo aysan jirin fasax sharci ah, caddeyn caafimaad, xaalado kale oo meel-mar ah oo ku yimid duruufo degdeg ah iyo xaalad ka baxsan awoodda Aadanaha.

## QODOBKA 9aad
## Guddiga Fulinta

Guddiga Fulintu ee Golaha (GMCQ) wuxuu ka koobnaanayaa xubnaha soo socda:

1. Guddoomiye;
2. Guddoomiye Ku-xigeen;
3. Sarkaalka Diiwaan-gelinta, Rukhsadda iyo aqoonsiga;
4. Sarkaalka tababarrada iyo kor-u-qaadista heerka aqoonta;
5. Sarkaalka Hubinta Tayada;
6. Sarkaalka arrimaha sharciga iyo Anshax-mihnadeedka;
7. Xoghaye; iyo
8. Khasnaji.

## QODOBKA 10aad
## Awoodaha iyo Xilalka Guddiga Fulinta

Guddiga fulintu wuxuu lahaanayaa awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Abuuridda guddi-hoosaadyo, isku-duwidda iyo kormeeridda hawlahooda.
2. Xaqiijinta hirgelinta go'aanada la gudbiyey si waafaqsan xeer-nidaaminta.
3. Fulinta go'aannada Golaha.
4. Matalaadda iyo qabashada xilalka Golaha xilliga uusan Goluhu kulansanayn, asagoon awood u lahayn in uu laalo, wax ka beddelo ama uu dib uga noqdo go'aannada Golaha.
5. Qabashada hawl-maalmeedka Golaha.
6. Hirgelinta wixii kale oo hawlo ah ee uu u tilmaamo Goluhu.
7. Diyaarinta iyo Gudbinta warbixinnada Golaha.

## QODOBKA 11aad
## Kulamada Guddiga Fulinta

1. Guddiga Fulintu wuxuu degsanayaa xeer-hoosaadyadiisa iyo habraaca kulamadiisa.
2. Guddiga Fulintu wuxuu isugu imaanayaa hadba sida loogu baahdo.
3. Tirada looga baahan yahay kulamada waa goob-joognimada in ka badan kala bar oo 1 (hal) lagu daray (50% +1) Xubnaha Guud ee Guddiga Fulinta.
4. Go'aan kasta waa in lagu meel-mariyo cod aqlabiyad ah (hal-dheeri), haddii ay codadku isla ekaadaan, waxaa la raacayaa dhanka uu u codeeyo Gudoomiyuhu.
5. Muddada xil-haynta Guddiga Fulinta waa saddex sanadood oo la cusboonaysiin karo Saddex sanadood markale.

## QODOBKA 12aad

## Kulamada Iyo Go'aannada Golaha

1. Sida caadiga ah, Goluhu wuxuu kulamadiisa rasmiga ah qabsanayaa afar jeer sanadkiiba.
2. Guddoomiyhu wuxuu isugu yeeri karaa kulamo dheeraad ah haddii ay noqoto lama-huraan.
3. Kulamada Goluhu waxaa shir-guddoominaya Guddoomiyaha, balse haddii Guddoomiyuhu maqan yahay, waxaa shir-guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka.
4. Goob-joognimada boqolkiiba konton oo 1 (hal) lagu daray (50%+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha ayuu ku ansaxayaa kulanka Golaha.
5. Ra'yiga aqlabiyada ayuu noqonayaa go'aanka kulanka Golaha. Haddii ay dhacdo in codadku isla ekaadaan, ruuxa shir-guddoominaya kulanka wuxuu lahaanayaa cod dheeri ah oo lagu kala baxayo.
6. Diiwaan-hayuhu waa in si rasmi ah u diiwaan-geliyaa go'aannada Golaha.
7. Hadal-qoraalada (murtida) kulanka waxaa la gaarsiinayaa laguna faafinayaa dhammaan xubnaha si ay taladooda uga soo dhiibtaan kaddibna u ansixiyaan.
8. Gunnooyinka iyo tas-hiilaadka kale ee ay ku helaan xubnuhu ka-qeyb-galka kulamada waxaa isla meel-dhigaya xubnaha Golaha.
9. Habraacyada kale ee la xiriira kulanka Golaha waxay ku salaysnaan doonaan sida uu go'aamiyo Goluhu.

## QODOBKA 13aad

## Guddiyada Kale Ee Gaar Ahaaneed

1. Saddex guddi oo gaar ah ayuu Goluhu abuurayaa oo lagu xulan doono aqoontooda, mihnadooda iyo waayo-aragnimada ballaaran ee hawshan ay u leeyihiin.

**B. Guddiga Cilmi-baarista Caafimaadka:**

Guddigani wuxuu darsayaa oo dib-u-eegayaa barotokoolada cilmi-baarista khusaysa caafimaadka oo loo soo gudbiyo Golaha si ay u oggolaadaan.

**T. Guddiga Anshaxa Mihnadleyaasha:**

Guddigani waxay shaqadiisu tahay wax ka qabashada eedaymaha la xiriira anshax-xumada Mihnadleyaasha iyo cabashooyinka kale ee xiriirka la leh oo la soo gaarsiiyo Golaha.

**J. Guddiga Qiimeynta Mihnadleyaasha:**

Guddi takhasus weyn leh oo loo xilsaaray in ay qaadaan imtixaan iyo habraacyada kale ee loogu talo-galay in codsadayaashu maraan si ay u suurowdo in la kala sooco lana diiwaan-galiyo.

2. Guddi kasta ee hore loo soo sheegay waxaa Goluhu u magacaabi doonaa gudoomiye.
3. Guddiyadu waxay warbixin iyo talo-bixinno siinayaan Guddoomiyaha. Kaddibna, Golaha ayaa ka baaraan-degi doona talo-bixintaas isagoo si habboon ugu dhisi doona siyaasadaha iyo qorashaha istaraatijiyadeed ee u dagsan.
4. Goluhu wuxuu raadsan karaa la-taliyeyaal madax-bannaan ee khuseeya arrinta markaas laga hadlayo. La-taliyeyaashaas oo aan lahayn danooyin iska hor-imaanaya ee ku aaddan xilalkooda. La-taliye kasta si shakhsi ah waxaa lagu abaal-marinayaa adeegga uu bixiyo iyadoo lagu lacag siinayo maalin ahaan ama saacad ahaan, tirada lacagta la siinayana aysan ka badnayn gunnada maalinlaha ah ee la siiyo xubinta Guddiga ee hawl qabata ama qeyb ahaan ku xiran waqtiga adeegyada uu bixiyey shakhsigu.

## QODOBKA 14[aad]
## Cilmi-baarista Caafimaadka

Hab-socodka cilmi-baarista caafimaadka, Goluhu wuxuu qorsheynayaa isla markaana qeybinayaa:

b) Tilmaamo ku aaddan cilmi-baarista caafimaadka oo ku habboon hawl-wadeennada caafimaadka Soomaaliya;
t) Natiijada ka soo baxda cilmi-baarista waxaa wadaagaya cilmi-baareyaasha iyo shakhsiyaadka daneynaya oo ay ku helayaan si lacag la’aan ah; iyo
j) Natiijada cilmi-baarista waxaa lagu qeybin karaa ama lagu faafin karaa ansixinta Golaha.

## QODOBKA 15$^{aad}$
## Abuuritaan Maktabad Asaasi ah ee Golaha

Maktabad macquul ah oo leh tiro qalab oo muhiim ah ayuu Goluhu ka hirgelinayaa xarunta xafiiskiisa. Maktabadda asaasiga ah waxaa loogu talo-galay in ay fududayso dib-u-eegista macluumaad iyo cilmi barista si loogu adeegsado tixraac ahaan. Waxaa intaa dheer, maktabaddu waxay gacan ka geysan doontaa arrimahan soo socda:

1) Bixinta macluumaadka khuseeya xeer-nidaaminta hay'adaha ku hawlan mihnadaha caafimaad.
2) Qiimeynta iyo baarista ku aaddan dhibaatooyinka caafimaad darro ee ka dhalata ama ay sabato jiritaan la`aanta sharci iyo hannaan xeer-nidaamiye caafimaad.
3) Daraasadaha anshaxa iyo asluubta Mihnadleyaasha caafimaadka.
4) Daraasadaha adkaynaya xushmadda loo hayo hannaanka xeer-nidaaminta caafimaad.
5) Goluhu wuxuu bixinayaa waxbarasho iyo baraarujin dhammaan xubnihiisa iyo guud ahaan Mihnadleyaasha caafimaad iyo inta kale oo daneyneysa ee ku hawlan sharciyada caafimaadka iyo saameynta ay ku leedahay caafimaadka iyo horumarka bulshadda.

## QODOBKA 16$^{aad}$
## Dhaqaalaha Golaha Iyo Ilaha Laga Helayo

Goluhu wuxuu dhaqaalaha u gaar ah ka abuurayaa ilahan hoose:

b) Khidmadda diiwaan-gelinta, rukhsad-bixinta, iyo aqoonsi siinta Mihnadleyaasha Caafimaadka; goobaha adeegga caafimaad, iyo xarumaha waxbarashada caafimaadka;
t) Dakhliga uu ka helo Goluhu ganaaxa ama ciqaabaha kale;
j) Qoondo miisaaniyadeed oo ay Xukuumadda Soomaaliya siineyso Golaha; iyo
a) Dhaqaalihii kale oo laga helo ilo kale.

## QODOBKA 17$^{aad}$
## Isticmaalka Dhaqaalaha Golaha

1. Goluhu wuxuu dhaqaalaha uu helo u adeegsanayaa ujeeddo ku aaddan bixinta kharashyada uu galo ee la xiriira hirgelinta awoodihiisa iyo waajibaadkiisa, gudashada xilalkiisa iyo shaqooyinkiisa.
2. Goluhu waa in uu soo bandhigaa:

b) Xisaabaad buuxa oo sax ah oo lagu keydiyo dhammaan dhaqaalaha uu Goluhu helay ama uu kharash ahaan u adeegsaday;

t) Warbixin sanadeedka dakhliga iyo kharashka oo loo diyaariyo si ku aaddan sanad-miisaaniyadeed kasta, sida xisaab-xirka muujinaya xaaladiisa maaliyadeed ee dhammaadka sanad-miisaaniyadeedkaas; iyo

j) Warbixin-sanadeedka iyo xisaab-xirka waa in uu ansixiyaa hanti-dhawre la aqoonsan yahay.

3. Guddomiyaha wuxuu warbixin maaliyadeed oo faahfaahsan saddexdii biloodba mar u gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda taas oo si cad u muujinaysa kharashka, haraaga, iyo sidoo kale qorshe-hawleedyada faahfaahsan ee lagu talo jiro in la hirgeliyo ka hor warbixin-maaliyadeedka soo fool leh, sidoo kalena in habkan lagu shaqeeyo loona adeegsado deeqaha xukuumadda laga helo.

## QODOBKA 18[aad]
## Xiriirka Iskaashi ee Golaha

1. Goluhu wuxuu abuurayaa xiriir dhaw ee xagga is-fahamka iyo wada-shaqeynta uu la yeelanayaa Wasaaradda Caafimaadka (WC), Wasaaradaha iyo hay`adaha kale ee daneeya adeegga caafimaadka.
2. Meelaha si dhow looga wada faa'iideysan karo waxaa kamid ah:

B. Ka-shaqeynta iyo is-dhaafsiga iskaashi dhinacyada farsamada iyo horumarinta Mihnadleyaasha caafimaadka;

T. Iskaashi xagga horumarinta adeegyada iyo xarumaha caafimaad;

J. si wada-jir ah lays kaga kaashado hirgelinta aqoon-isweydaarsiyo iyo tababarro;

X. Iskaashiga in la is-dhaafsado macluumaadka iyo isu-gudbinta khibradaha sare; iyo

KH. Isu-gudbinta mihnadaha iyo kor-u-qaadida kartida.

## QODOBKA 19aad
## Khidmado

Goluhu wuxuu khidmado saarayaa diiwaan-gelinta, rukhsad-bixinta, ansixitaanka iyo barotokoolada cilmi-baarista, waxaana kamid ah:

b. Machadyada tababarada caafimaad ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay;

t. Rugaha caafimaad ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay;

j. Mihnadleyaasha caafimaad ee muwaadiniinta ah iyo kuwa shisheeye oo loo sameynayo diiwaan-gelin, rukhsad-siin iyo dib-u-rukhsad-siin;

x. Dakhliga hawl-haynta sanadeed; iyo

kh. Dib-u-eegid barotokoolada cilmi-baarista caafimaad.

## QODOBKA 20aad
## Diiwaan-gelinta, Rukhsad-siinta iyo Ansixinta

Ujeeddada diiwaan-gelinta, Rukhsad-siinta iyo Ansixitaanka waa in la tixgeliyaa mabaadi'da soo socota:

1. Dhammaan xarumaha waxbarashada caafimaad ee Soomaaliya, ha ahaadeen kuwo dawladeed ama kuwa gaar loo leeyahay, waa in laga anxisiyaa xafiiska Golaha si loo hubiyo taabbo-galnimadooda.
2. Marka ardaygu uu soo qalin-jebiyo waxaa sharci ah in uu si degdeg ah u soo codsado diiwaan-gelin iyo rukhsad-siin. Diiwaan-gelinta waxay qeexeysaa ama caddeyneysaa nooca barnaamijka, heerka adeegga ee loo oggolaan karo iyo shahaadooyinka uu haysto.
3. Sharci ahaan, waxaa ka-reeban dhammaan Mihnadleyaasha caafimaad ee shisheeye in ay u hawl-galaan sidii hawl-wadeenno caafimaad ka hor inta aan la diiwaan-gelin ama la rukhsad-siin.
4. Rug kasta oo adeegyo caafimaad siisa bulshada waa in ay yihiin kuwo diinwaan gashan, rukhsad leh, loona oggolaaday fulinta adeegyo caafimaad.

5. Dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan xarumaha waxbarashada caafimaad ee Dawladda ama gaarka ah iyo goobaha caafimaad waa in uu soo gudbiyaa codsigooda mas'uul darajo sare leh oo matali kara xarunta ama goobta caafimaad.

## QODOBKA 21aad
## Diiwaan-gelinta Mihnadleyaasha Caafimaad

**B- Codsi Diiwaan-gelin**

1. Qofka raba in loo diiwaan-geliyo Mihnadle caafimaad, wuxuu ka codsanayaa Golaha isagoo soo buuxinaya warqadda codsiga isla markaana bixinaya khidmada looga baahan yahay ka hor inta uusan hawl-gelin.
2. Codsiga waa in ay wehliyaan caddeynta shahaadooyinka codsadaha, fayo-qabka jireed iyo midda dhimireed, sidoo kalena taariikhda fal-dembiyeed, haddii uu jiro.
3. Goluhu wuxuu go'aamin karaa khidmado kala duwan ee heerarka kala duwan ee Mihnadleyaasha caafimaad.
4. Goluhu, soddon cisho gudahood marka uu helo codsiga wuxuu si waafaqsan Faqradda (1) oggolaanayaa ama diidayaa codsiga.
5. Goluhu, haddii uu ku qanco mudnaanshaha codsadaha wuxuu sii wadayaa dhammeystirka hab-socodka diiwaan-gelinta.
6. Goluhu, haddii uu diido codsi si waafaqsan Faqradda (4), wuxuu si hab-sami ah u wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
7. Goluhu ma diiwaan-gelinayo codsadeyaasha hore magacyadooda looga saaray diiwaan midkan la mid ah ee dal kale sababo la xiriira anshax-xumo xitaa haddii ay buuxiyaan dhammaan shuruudihii looga baahnaa.

**T- Joojinta hawl-galka Mihnadleyaasha aan diiwaan-gashanayn**

1. Cidna looma oggola in ay u hawl-gasho Mihnadle caafimaad ahaan, haddii uusan qofkaasi u diiwaan-gashanayn hawlgalkaas.

2. Qofka u qalma mihnadaas balse aan diiwaan-gashanayn, oo ku xad-gudba Faqradda (1) wuxuu gelayaa xad-gudub isagoo mutaysanaya, haddii lagu helo, ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo Kun Doolarka Maraykanka ah (US$2,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn hal sano, ama labadaba oo ku xiran hadba culeyska fal-dembiyeedka.
3. Qof aan u qalmin isla markaana ku xad-gudba Faqrad (1) wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ciaqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn Afar Kun Doolarka Maraykanka ah (US$4,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn laba sanadood, ama labadaba haddii ay jiraan waxyeellooyin ka dhashay hawl-qabadkiisa.

## QODOBKA 22aad

## Shuruudaha Diiwaan-gelint ee Mihnadleyaasha Caafimaad

1. Qofna looma oggola in loo diiwaan-geliyo Mihnadle caafimaad haddii qofkaasi uusan:
   b) Haysan shahaado asaasi ah oo uu bixiyey machad ama xarun waxbarasho uu Goluhu aqoonsan yahay.
   t) In uu ka gudbo kulan wareysiga iyo imtixaanka uu la yeelanayo Goluhu; iyo
   j) In uu si buuxda u fuliyo dhammaan shuruudaha uu go’aamiyey Goluhu.
2. Goluhu, haddii codsadaha buuxiyo shuruudaha Xeerkani tilmaamayo, wuxuu u diiwaan-gelinayaa codsadaha in uu yahay Mihnadle caafimaad isagoo siinaya shahaado diiwaan-gelin.

## QODOBKA 23aad

## Heerarka Diiwaan-gelinta

**B. Diiwaan-gelin Ku-meel-gaar ah**

1. Qof haysta shahaado uu bixiyey xarun waxbarasho ee uu aqoonsan yahay Goluhu, wuxuu xaq u leeyahay diiwaan-gelin ku-meel-gaar ah, waxaase looga baahan yahay in uu dhammeystirto muddo cayiman oo lagu kormeerayo si loo hubiyo wax-qabadkiisa uuna u gaaro diiwaan-gelin buuxda.

2. Goluhu, marka qof u soo gudbiyo codsigiisa si waafaqsan faqradda (1), wuxuu siinayaa shahaado Diiwaan-gelin oo ku-meel-gaar ah haddii:
    b) Codsaduhu buuxiyo shuruudaha diiwaan-gelinta ku-meel-gaarka ah; iyo
    t) Goluhu wuxuu go'aaminayaa in tababarka uu hore u qaatay codsaduhu uu u dhigmo kan looga baahan yahay diiwaan-gelinta ku-meel-gaarka ah.
3. Goluhu, haddii ay dhacdo in uu diido diiwaan-gelinta ku-meel gaarka ah, wuxuu si hab-sami leh ugu wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha lagu diiday codsigiisa.
4. Qofka haysta shahaado diiwaan-gelin oo ku-meel-gaar ah wuxuu si ku-meel-gaar ah uga hawl-geli karaa hawlaha adeegyada caafimaad ee Soomaaliya.
5. Qofka haysta diiwaan-gelinta ku-meel-gaarka ah wuxuu ka hawl-geli karaa oo keliya rug caafimaad ama xarun waxbarasho uu aqoonsan yahay Goluhu.
6. Goluhu waa in uusan qofna ku diiwaan-gelin shahaado ku-meel-gaar ah muddo ka badan laba sano.

**T- Diiwaan-gelin Buuxda**

1. Mihnadlaha caafimaadka wuxuu xaq u leeyahay diiwaan-gelin buuxda ee mihnadda caafimaad ee ay shahaadooyinkiisu la xiriiraan haddii:
    b) Qofka haysta shahaado la aqoonsan yahay oo ah heer Diblooma, Darajada Kowaad ee Jaamacadeed ee la xiriirta qeyb gaar ah ee mihnad caafimaad ee uu bixiyey xarun waxbarasho oo si sharci ah uga diiwaan-gashan Soomaaliya, ama xarun waxbarasho shisheeye oo la aqoonsan yahay; iyo
    t) In uu horay ku-meel-gaar ahaan u diiwan-gashanaa soona dhamaystay muddadii diiwaan-gelinta ku meel gaarka ahayd.
2. Qofka si ku-meel-gaar ah u diiwaan-gashan wuxuu gelayaa imtixaan si loo qiimeeyo kartidiisa aqooneed iyo habsami-u-fulinta wax-qabadka mihnadda caafimaad inta uusan u gudbin diiwaan-gelinta buuxda.

3. Shahaadooyinka ku xusan faqradda (1) ka sokow, waa in qofku ka qanciyaa Golaha waayo-aragnimada looga baahan yahay adeegidda waqti buuxda oo ay wehliso khibrad muddo afar iyo labaatan bilood ee isbitaal uu aqoonsan yahay Goluhu.
4. Qofku waa in uu keenaa caddeynta dokumentiyada asalka ah ee la xiriira aqoontiisa.
5. Diiwaan-gelinta buuxda waxay jiraysaa muddo saddex sanadood ah laga bilaabo taariikhda la bixiyey.
6. Goluhu wuxuu kala noqonayaa diiwaan-gelinta buuxda haddii qofku:
    - b) Uu waxyeello u leeyahay in uu ka hawl-galo mihnadaha caafimaadka taasoo saameyn karta badqabka bulshada;
    - T) Uu leeyahay taariikh fal dembiyeed oo gaarsiisan in uu saameyn xun ku yeesho shakhsiyaadka ka hawlgala mihnadda; iyo
    - j) Qaabka hawleedka, baaxadda, iyo muddada waxqabadkii hore ee mihnadda aysan ku filnayn in ay buuxiyaan shuruudaha asaasiga ah.

**J. Diiwaan-gelin Takhasusle**

1. Qofku wuxuu xaq u leeyahay diiwaan-gelin takhasusle ee takhasus mihnad caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii:
    - b. Qofku haysto shahaadada darajada labaad ee jaamacadeed oo takhasus la aqoonsan yahay ah; iyo
    - t. In qofku uu mudan yahay una qalmo diiwaan-gelinta takhasus la aqoonsan yahay ee mihnad caafimaad.
2. Raad-raaca mihnad caafimaad ee takhasuska waa in ay lahaato tixraac hore oo caddeynahaya in takhasus mihnadlaha caafimaad ay xiriir toos ah la leedahay waxbarashadii hore.
3. Diiwaan-gelinta guud ee mihnadda caafimaad ee takhasuska waa in ay noqoto mid leh tixraac diiwaan-gelineed oo sugeysa in mihnadan ay tahy takhasus la aqoonsan yahay.
4. Muddada diiwaan-gelinta ee Mihnadle caafimaad ee la siiyey diiwaan-gelin takhasus la aqoonsan yahay waxay tahay muddo aan ka badnayn 24 bilood.

## QODOBKA 24aad

### Beddelaadda Macluumaad

Mihnadlaha diiwaan-gashan waa in uu ku wargeliyaa Diiwaan-hayaha wax kasta oo beddelaad ah oo ku dhaca macluumaadka gaarka ah ee qofkaas ee la xiriirta diiwaan-gelinta, muddo toddoba maalmood gudahood ah, sida uu qabo Xeerkan.

## QODOBKA 25aad

### Kala-noqoshada Diiwaan-gelinta

1. Goluhu wuxuu kala-noqonayaa diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad haddii—
   - b) Goluhu helo sababo meel mar ah ee uu ku rumeysan karo in diiwaan-gelinta lagu helay hab musuq ah, been abuur ama qarinta xaqiiqada dhabta ah;
   - t) Mihnadlaha caafimaadka ay ku caddaato in uu galay xad-gudub anshax-xumo mihnadeed ama hawlo lid ku ah xurmad mihnadeedka iyo niyad wanaagga;
   - j) Mihnadlaha caafimaadka uu ka hawl galo rug caafimaad oo uusan diiwaan-gelin u haysan;
   - x) Muddada diiwaan-gelinta ee mihnadlaha caafimaadka ay dhacdo;
   - kh) Mihnadlaha caafimaadka lagu helo xad-gudub sharci kasta oo jira; ama
   - d) Xilligii diiwaan-galinta ay soo if-baxaan xaalado muujinaya in mihnadalaha uusan uqalmin in la diiwaan-geliyo.
2. Goluhu wuxuu, ka hor inta uusan kala laaban diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad si waafaqsan Faqradda (1), siinayaa mihnadlaha fursad lagu dhegaysto.

3. Goluhu waxaa u furan ka hor inta uusan baabi'in diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad, in uu ka xayiro hawlihiisa muddadaas iyadoo qodobada iyo shuruudaha Golaha la tixgelinayo
4. Haddii Goluhu baabi'yo diiwaan-gelinta qof sida waafaqsan Qodobkan, magaca qofka waa in laga saaraa Diiwaanka oo aan dib loogu soo celineyn haddii aan la helin shuruudo u oggolaanaya in dib loo diiwaan-geliyo oo Goluhu ku qancay.

## QODOBKA 26aad

### Ka noqoshada Diiwaan-gelin Shahaado

Haddii Goluhu helo macluumaad in magaca qofka lagu diiwaan-geliyey si musuq ah ama khalad ah oo la xaqiijiyey baaris kaddib in arrinkani uu yahay dhab, Goluhu waxa uu hakin karaa ku shaqeynteeda isla markaana dib uga noqon karaa diiwaan-gelinta shahaadada qofkaas.

## QODOBKA 27aad

### Dib-u-diiwaan-gelin

1. Mihnadlaha haysta shahaado horay loo diiwaan-geliyey muddadii loogu talo-galayna ay dhammaatay, wuxuu ka soo codsan karaa Golaha shahaado dib u cusbooneysiin isagoo raacaya hannaanka loo dejiyey, isla markaana bixinaya khidmadda looga baahan yahay.
2. Goluhu wuxuu, muddo Shan iyo toban maalmood gudahood ah kaddib helitaanka codsiga sida waafaqsan Faqradda (1), oggolaanayaa ama diidayaa codsigaas.
3. Goluhu wuxuu, haddii ay dhacdo in uu diido codsiga si waafaqsan Faqradda (2), ku wargelinayaa codsadaha si habsami leh asagoona u sheegaya sababaha diidmada.
4. Haddii lagala noqdo mihnadlaha caafimaad diiwaan-gelinta ama la laalo, taas oo waafaqsan qodobada iyo shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo, mihnadlaha caafimaad ee arrintaasi saameysay wuxuu codsan karaa dib u diiwaan-gelin.
5. Sida ku cad qodobada Xeerkan, Goluhu wuxuu siin karaa shahaado dib u diiwaan-gelin:

   (b) Haystaha shahaado diiwaan-gelin ku-meel-gaar ah, haddii haystuhu—

1) Uu ka hawlgalo rug caafimaad oo uu oggolaaday Goluhu muddo aan ka yareyn afar iyo labaatan bilood;

2) Ka gudbo imtixaanka laga qaaday;

3) Uu leeyahay asluub wanaagsan iyo hab dhaqan mihnadeed oo habboon; iyo

4) Uu buuxiyo shuruudaha kale ee looga baahan yahay.

(t) Haystaha shahaado diiwaan-gelin buuxda, haddii uu buuxiyo—

1) Shuruudaha looga baahan yahay horumarinta joogtada ah ee mihnada Mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan.

2) Shuruudaha ku aaddan hab dhaqanka, baaxadda, iyo muddada uu shaqada soo hayey ee codsaduhu doonayo in loo diiwaan-geliyo; iyo

3) Awoodda hawl wadeenku u leeyahay in uu wax kula xiriiro Afka Soomaaliga.

## QODOBKA 28aad

### Nuqul Sameyn Shahaado Diiwaan-gelin

1. Haddii qof ay shahaado u diiwaan-gashan ay ka baaba'do ama ka lunto wuxuu ka soo codsan karaa Golaha in loo sameeyo nuqul cusub ee la xiriirta diiwaan-gelinta shahaadadiisa.
2. Diiwaan-hayuhu wuxuu, kaddib helitaanka codsiga si waafaqsan Faqradda (1), siinayaa codsadaha nuqul shahaado diiwaan-gelin.

## QODOBKA 29aad

### Diiwaan-gelinta Mihnadleyaasha Caafimaadka Shisheeye

1. Mihnadladaha caafimaad ee shisheeye oo doonaya in uu is diiwaan-geliyo waa inuu:

b) Haystaa deganaansho sharci ah ee Soomaaliya;

t) Haystaa shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;

j) Ka gudbaa imtixaanka loogu talo-galay.

x) Soo buuxiyaa shuruudaha kale ee ku cad foomka diiwaan-gelinta.

2. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo buuxiyey shuruudaha ku tilmaaman faqradda (1) (b), (t), (j) & (x) waxaa kormeer iyo massuliyad ku leh xarunta caafimaad ee uu shaqada u hayo.

**B- Diiwaan-gelin Kumeel Gaar ah**

1. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye wuxuu codsan karaa diiwaan-gelin ku meel gaar ah.
2. Goluhu wuxuu siinayaa codsadaha shisheeye shahaado diiwaan-gelin ku meel gaar ah kaddib helitaanka codsiga lagu soo gudbiyey si waafaqsan Faqradda (1), haddii codsaduhu:
   b) Haysto deganaansho sharci ah ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya;
   t) Leeyahay aqoon iyo tababar ku filan ee looga baahan yahay;
   j) Ka gudbay kulan wareysiga iyo imtixaanka Goluhu ka qaaday;
   a) Soo gudbiyo shahaado asluub wanaag uu ka soo qaatay hay'ado mihnadeed oo laga aqoonsan yahay dalka uu mihnadluhu ka diiwaan-gashan yahay;
   kh) Soo gudbiyo caddeyn ku aaddan in mihnadluhu leeyahay aqoon ku filan ee Afka Carabiga ama Ingiriisiga; iyo
   d) Uga shaqaynayo Soomaaliya codsiga Xukuumadda ama xarun caafimaad oo oggolaasho u haysata keenista Mihnadlaha Shisheeye si waafaqsan Xeerkan.
3. Muddada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan-gelinta ku meel gaarka ah waa muddo ku siman lix bilood.
4. Goluhu wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha shisheeye haddii ay dhacdo in uu diido codsiga diiwaan-gelinta ku meel gaarka ah isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
5. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo haysta shahaado diiwaan-gelin ku meel gaar ah waa loo cusbooneysiin karaa shahaadadiisa haddii uu:
   b) Dhammeysto lix bilood oo shaqo xiriir ah ee rug caafimaad oo leh darajada A ama darajada B si waafaqsan Qodobka 38; iyo
   t) Soo-gudbiyo qoraal uu bixiyey kormeeraha qofkaas ee rugta caafimaad oo caddeynaya in qofku uu si habsami ah u gutay xilkiisa, isla markaana uu

muujiyey mihnad iyo aqoon u dhiganta mida lagu tababaro Mihnadleyaasha caafimaad ee Soomaaliya.

**T- Diiwaan-gelin Xadidan**

1. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye wuxuu xaq u leeyahay in uu isku diiwaan-geliyo diiwaan-gelin xadidan haddii:

    b) Uu haysto deganaansho sharci ah ee Soomaaliya;

    t) Hore loogu soo diiwaan-geliyey si ku-meel-gaar ah;

    j) Uu ku gudbo imtixaanka laga qaaday; iyo

    x) Ay soo gudbisay codsigiisa rug caafimaad oo la aqoonsan yahay.

2. Goluhu wuxuu ku diiwaan-gelinayaa mihnadlaha shisheeye darajo u dhiganta tii uu uga shaqaynayey dalka uu ka yimid, haddii:

    b) Uu haysto deganaansho sharciga ah ee Soomaaliya;

    t) Uu leeyahay asluub-wanaag mihnadeed ee dalka uu ka yimid oo la xiriirta adeegga caafimaad, iyo

    j) Uu ku gudbay imtixaanka uu ka qaaday Goluhu.

3. Mihnadlaha shisheeye kuma haysan karo diiwaan-gelinta xadidan wax ka badan hal takhasus sida uu qabo Xeerkani.
4. Goluhu wuxuu qeexayaa qodobada iyo shuruudaha looga baahan yahay diiwaan-gelinta xadidan si waafaqsan faqraddan, sidoo kalena hawlaha la qabanayo, ama dabeecadda kormeerka loo baahan yahay ee mihnadlaha caafimaad ee shisheeye.
5. Muddada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan-gelinta xadidan waa muddo ku siman 12 (laba iyo toban) bilood.
6. Goluhu wuxuu u cusboonaysiinayaa diiwaan-gelinta muddada xaddidan ee Mihnadle caafimaad ee shisheeye si waafaqsan faqraddan qodobadeeda iyo shuruudo uu Goluhu go’aamiyey haddii xarunta caafimaadku ay soo codsato.

# QODOBKA 30aad
## Xad-Gudubyada Ka Yimaada Mihnadle Caafimaad

**B) Mihnadlaha Diiwaan-gashan:**

Mihnadlaha Caafimaad oo haysta shahaado GMCQ diiwaan-geliyey, wuxuu gelayaa xad-gudub haddii uu:

1. Beddelo, ama tirtiro, macluumaadka ku qoran shahaadada diiwaan-gelinta ama nuqulka shahaado kale uu bixiyey Golaha.
2. Been-abuuro ama adeegsado mansab hawl-wadeen caafimaad oo diiwaan-gashan iyadoo aan lagu diiwaan-gashanayn sida uu qabo Xeerkani.
3. Hawl-geliyo xarun waxbarasho caafimaad (XWC) ama xarun bixisa adeegyo caafimaad (XAC) oo Goluhu uusan oggolaansho siin.
4. Qariyo xaqiiqada dhabta ah ama lagu helo isku-day matalaad iyo musuq ku saleysan.
5. Siiyo shahaado aqooneed ee mihnadda caafimaadka qof aan ku guulaysan imtixaanada mihnadeed ee looga baahnaa in ay bixiso xarunta waxbarashada caafimaad oo la aqoonsan yahay.
6. Been-abuuro shahaado diiwaan-gelin ama shahaado kale oo uu bixiyey Goluhu.
7. Ku shaqeysta mihnad caafimaad oo aan loo haysan rukhsad shaqeynaysa oo uu bixiyey Golahu.
8. Fuliyo adeegyo daryeel caafimaad oo dhaafsan heerka loo xaddiday mihnadlaha caafimaad ee diiwaan-gashan.
9. Bixiyo adeeg caafimaad sida baarista, daweynta, qalliin oo waxyeelo u geysta bukaanka taas oo ku timaada dayacaad iyo xil-gudasho-xumi.
10. Faafiyo xog bukaanka ayadoo aysan jirin wax qasbaya.
11. Dayaco bukaanka ama uga faa'iideysto danahiisa gaar ahaaneed.
12. Xurmeyn-waayo habraaca daweynta, anshaxa iyo xushmadda xirfadda caafimaadka.

**T)** Qofkii ku xad-gudba Faqradda (b), wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn kun Doolarka Maraykanka ah (US$1,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn 1 (hal) sano, ama labadaba iyadoo lagu saleynayo baaxadda xad-gudubka uu galay.

## QODOBKA 31aad
## Diiwaan-gelinta Xarun Caafimaad

1. Codsiga diiwaan-gelinta ee xarun caafimaad waa in loo soo gudbiyaa Golaha ka hor inta aysan rugaha caafimaad ka hawl-gelin adeegyada caafimaadka.
2. Goluhu wuxuu diiwaan-gelinayaa Xarumaha caafimaadka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, marka la dhammeystiro diiwan-geelintaas ayaa loo aqoonsanayaa xarun si sharci ah u diiwaan-gashan.
3. Sida uu qabo xeerkani, diiwaan-hayuhu wuxuu diiwaan-galinyaa farmashiyada gaarka ah, iyo xarumaha baarista ee gaarka loo leeyahay.
4. Jiritaanka diiwaan-gelinta ee rugaha caafimaad sida ku tilmaaman Faqrada (2) waa laba sano laga bilaabo taariikhda diiwaan-gelinta ayadoo la cusbooneysiinayo labadii sanaba mar.

## QODOBKA 32aad
## Rukhsad-siin Mihnadle Caafimaad

**B- Joojin Hawl-qabadka Mihnadlaha aan Rukhsad lahayn**

1. Qofna uma hawl-geli karo sidii Mihnadle caafimaad asagoo aan haysan rukhsad uu bixiyey Goluhu.
2. Qofka ku xad-gudba Faqradda (1) wuxuu gelayaa xad-gudub isagoo mutaysanaya ganaax lacageed oo aan ka badnayn Laba Kun Doolarka Maraykanka ah (US$2,000) ama xabsi aan ka yarayn hal sano kana badnayn saddex sano, ama labadaba, haddii lagu helo fal dambiyeedkaas.

**T- Codsi Rukhsadda Hawl-qabad ee Mihnadle Caafimaad**

1. Mihnadlaha caafimaadka waa in uu soo codsadaa rukhsad hawl-qabad si waafaqsan hannaanka degsan ee la xiriira daweynta guud, ilkaha, kalkaaliye, umuliso, ama mihnad kale ee gaar ahaaneed.
2. Mihnadlaha caafimaad ma codsan karo rukhsad hawl-qabad isaga oo aan marka hore is-diiwaan-gelin. Nuqulka asalka ah ee shahaadada diiwaan-gelinta waa in uu wehliyaa codsiga rukhsadda.
3. Diwaan-hayaha waa inuu hubiyaa in codsadaha rukhsadda soo dhammeystiray shuruudaha looga baahan yahay, sida shahaadooyinka, imtixaanka, khibrada looga baahan yahay, iyo kulan wareysiyada uu la yeelanayo Golaha.
4. Goluhu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyey shuruudaha ku xusan faqradda (3) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in la siiyo codsadaha rukhsad hawl-qabad.
5. Mihnadlaha caafimaad wuxuu sanadka kowaad ee shaqadiisa lagu rukhsad siinayaa hal sano oo tijaabo ah si loo hubiyo kartida iyo waxtarka shaqadiisa.
6. Haddii Goluhu diido codsiga rukhsad siinta, diiwaan-hayuhu wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go`aanka Golaha isagoo u sheegaya sababaha diidmada.
7. Rukhsadda hawl-qabad ee lagu bixiyey sida ku tilmaaman Faqradda (4) waxay jiraysaa labo sano laga bilaabo taariikhda la bixiyey iyadoo la cusbooneysiinayo labadii sanaba mar.

## QODOBKA 33aad
## Cusboonaysiin Rukhsad Hawl-qabad

1. Mihnadlaha caafimaad ee ay dhacdo rukhsaddiisa hawl-qabad waa inuu Golaha u soo gudbiyaa codsi cusbooneysiin ee rukhsadda hawl-qabadka.
2. Mihnadlaha caafimaadka marka uu soo gudbinayo codsiga cusbooneysiinta rukhsadda waa in:
    - b) Uu buuxiyo foomka cusbooneysiinta rukhsadda;
    - t) Uu la yimaado caddeyn kartidiisa mihnadeed iyo asluub-wanaag ay sugtay xarun caafimaad oo leh rukhsad;

J) Uu la yimaado shahaadooyinka ama caddeymaha horumarinta joogtada ah ee mihnaddiisa aqooneed;

x) Uu maraa baaritaanka fayo-qabka; iyo

Kh) Uu galo imtixaanka, kulan-wareysiga, iyo qiimeynta uu Goluhu ka qaado.

3. Diwaan-hayaha waa inuu hubiyaa in codsadaha cusbooneysiinta rukhsadda soo dhammeystiray shuruudaha ku xusan faqradda (2).
4. Goluhu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyey shuruudaha cusbooneysiinta rukhsadda ku xusan faqradda (2) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in loo cusbooneysiiyo codsadaha rukhsad hawl-qabad.
5. Haddii Goluhu diido codsiga cusbooneysiinta rukhsad hawl-qabad, diiwaan-hayuhu wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go`aanka Golaha isagoo u sheegaya sababaha diidmada.
6. Mihnadlaha da`diisu ka weyn tahay 65 sano wuxuu marayaa baaritaanka bad-qabka caafimaad oo lagu hubinayo fayo-qabka aragga, maqalka, iyo maskaxda mihnadlaha soo codsaday cusbooneysiinta rukhsadda.
7. Rukhsadda la bixiyey oo aan la cusboonaysiin sida ku tilmaaman Faqradda (1) waa wax kama jiraan.
8. Mihnadle caafimaad ee sii wata hawl-qabadkiisa kaddib marka Rukhsadiisa laga dhigo wax kama jiraan wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn Toddoba Boqol oo Doolarka Maraykanka ah (US$700) ama xabsi muddo aan ka badnayn Toddoba bilood, ama labadaba.

## QODOBKA 34aad
## Muujin Rukhsadeed

Mihnadlaha la siiyey rukhsad adeeg gaar ahaaneed ee caafimaad, wuxuu ku muujinayaa rukhsadiisa meel laga arki karo oo kamid ah goobta shaqada.

## QODOBKA 35aad
## Kala-noqosho Rukhsad

1. Goluhu wuxuu kala noqonayaa shahaadada hawl-qabadka haddii haystaha:

   b) Lagu helo xad-gudub ku salaysan anshax-xumo mihnadeed;

   T) La xaqiijiyo in uusan maskax ahaan fayo-qab ahayn;

   j) Uu shahaadada hawl-qabad uu ku helay si musuq ah, been-abuur ah ama qarin xaqiiqda dhabta ah; iyo

   x. Uu galo xad-gudub ku salaysan Xeerkan ama uu meel uga dhaco nidaamka anshaxa.

2. Haddii diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad lagala noqdo si waafaqsan Xeerkan, shahaadada hawl-qabad ee uu haysto mihnadluhu waxay noqonaysaa mid wax kama jiraan ah waana in dib loogu celiyaa Golaha.
3. Goluhu wuxuu siinayaa mihnadlaha caafimaad fursad lagu dhegaysto ka hor inta uusan kala noqon shahaadada hawl-qabad ee mihnadlaha caafimaad sida uu tilmaamayo Qodobkani.
4. Goluhu wuxuu ka hakinayaa mihnadlaha caafimaadka hawsha muddadaas si ku aaddan qodobada iyo shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo ka hor inta uusan kala noqon shahaadada hawl-qabad ee mihnadlahaas caafimaad.

## QODOBKA 36aad
## Rukhsad-siin Xarun Caafimaad

**B- Shaqo-ka-joojin Xarun Caafimaad oo aan Lahayn Rakhsad**

1. Lama hawl-gelin karo xarun caafimaad iyadoo aan marka hore la siin rukhsad ay ku hawl-gasho oo uu bixiyey Goluhu.
2. Haddii lagu helo xarun caafimaad in ay jebisay Faqradda (1) waxay gelaysaa xad-gudub iyadoo mutaysanaysa ganaax lacageed oo aan ka badnayn Laba Kun Doolarka Maraykanka ah (US$2,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn hal sano, ama labadaba.

**T- Codsi Oggolaansho  Hawl-gelin Xarun Caafimaad**

Qofka doonaya in uu furto xarun caafimaad waa in uu ka codsadaa Golaha rukhsad ka hor inta aan xaruntaas loo hawl-gelin xarun caafimaad ahaan.

## QODOBKA 37aad
## Cusboonaysiin Rukhsad Xarun Caafimaad

Darajo kasta oo rukhsadda lagu bixiyey oo waafaqsan Faqradda (2) ee qodobka 38aad, waa in la cusboonaysiiyaa halkii sanaba mar laga bilaabo taariikhda la bixiyey.

## QODOBKA 38aad
## Diidmo Bixin Rukhsad Xarun Caafimaad

1. Goluhu ma oggolaanayo codsi rukhsad-bixin lagu hawl-galiyo Xarun caafimaad haddii:
    - b) Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uu faraha kula jiro xad-gudub ka dhan ah qodobada Xeerkan;
    - t) Mihnadlaha caafimaad ee ka mas'uulka ah xarunta uusan lahayn diiwaan-gelin, isla markaana haysan rukhsad hawl-gal oon dhacsaneyn;
    - j) Xarunta caafimaad aysan buuxin dhismo ahaan, shaqaale ahaan, qalab ama qaab-dhismeedka hay'ad ee looga baahnaa rukhsad-siinta; ama
    - x) Mihnadlaha caafimaad ee mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uusan haysan shahaado diiwaan-gelin ugu yaraan muddo gaaraysa saddex sanadood ka hor taariikhda codsiga.
    - Kh) Goluhu ku qancin in mihnadlaha caafimaad uu si haboon uga diiwaan-gashan yahay isla markaana leeyahay waayo aragnimo dal kale oo u dhiganta mida looga baahan yahay Soomaaliya.
2. Goluhu wuxuu si habboon ugu wargelinayaa codsadaha haddii la diido codsiga rukhsadda xarunta caafimaad sida ku tilmaaman Faqradda (1), isagoo u sheegaya sababaha diidmada.

3. Xarunta caafimaad oo la siiyey rukhsad, waxaa rukhsadeeda lagu muujinayaa meel muuqata oo kamid ah xarunta caafimaadka.
4. Haddii mihnadlaha la siiyey rukhsadda xarunta uu go'aansado in uusan sii wadin adeegga xarunta wuxuu rukhsadda u soo celinahayaa Golaha.
5. Goluhu wuxuu xaq u leeyahay in uu wax ka-beddelo rukhsadda haddii:
    - b) Cid kale la wareegto xarunta caafimaad ee uu lahaa rukhsadle kale, isagoo ku bedelaya magaca cidda la wareegeysa; ama
    - t) Magaca xarunta caafimaad isbeddelo, iyadoo magaca cusub lagu beddelayo kii hore.
6. Goluhu wuxuu cubsoonaysiinaya rukhsadda xarunta caafimaad ee lagu bixiyey si waafaqsan Xeerkan haddii:
    - b) Xaruntu ay si buuxda u dhaqan geliso nidaamka darajada lagu rukhsad siiyey.
    - t) Xaruntu ay gudbiso macluumaad dhammeystiran uu Goluhu u baahan yahay oo shuruud u ah cusboonaysiinta rukhsadda; iyo
    - j) Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uu bixiyo khidmada cusbooneysiinta.

## QODOBKA 39$^{aad}$

## Baarista Rug Caafimaad

1. Xarunta caafimaad waxaa baaraya khubaro aqoon iyo waayo aragnimo ballaaran leh oo uu Goluhu magacaabo.
2. Baarayaasha waxay muujinayaan caddeymahooda si loo aqoonsado xilliga ay ku hawlan yihiin baaritaanka.
3. Xarunta caafimaad waxaa la baarayaa inta aan la bixin rukhsadda ka hor iyo ugu yaraan lix bilood oo kasta.
4. Baaruhu wuxuu awood u leeyaay in uu si habboon u galo ama u baaro goobaha loo adeegsado, ama baaruha ku qanco in loo adeegsado xarun caafimaad.

5. Baaruhu wuxuu baari karaa rukhsadda hawl galka ee mihnadlaha ee ka hawlgala xarunta caafimaad iyo diinwaanka lagu qoro warbixinta loo baahan yahay sida uu qabo Xeerkani.
6. Baaruhu wuxuu baari karaa xarunt caafimaad iyo qalabka ay xarunta u adeegsato ayadoo laga fiirinayo inay waafaqsan tahay nidaamka lagu rukhsad siiyey.
7. Baaruhu ma baari karo macluumaadka daawo ee bukaanka.
8. Mas`uulka ama cidda ay khusayso xarunta caafimaad haduu:
    b) Dib u dhig ama is-hortaag ku sameeyo baare gudanaya hawlihiisa baarista;
    t) Diida in uu si hufan gacan u siiyo baaraha si uu u guto awoodihiisa baare;
    j) Siiya baaraha macluumaad been ama marin habaabin ah.
    x) Qofka lagu helo qodobada (b), (t) & (j) wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn Kun Doolarka Maraykan ah (US$1,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn hal sano, ama labadaba.
9. Baaruhu wuxuu u soo gudbinayaa Golaha warbixin qoraal ah ee la xiriirta natiijooyinka baarista.

## QODOBKA 40aad

## Xiritaan Xarun Caafimaad

1. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu amro xiritaanka xarunta cafimaad haddii:
    b) Xarunta caafimaad ay ku xad-gudubto shuruudaha rukhsadda lagu siiyey.
    t) Xarunta caafimaad aan lagu rukhsad-siin si waafaqsan Xeerkan;
    j) Xarunta caafimaad ay ku caddaato in adeeg ay bixisay uu waxyeelo kasoo gaaray bukaan taas oo ku timid tayo-xumo, aqoon-yari, ama dayac; ama
    x) Xarunta caafimaad jebiso qodobada Xeerkan ama sharci kale.
2. Goluhu wuxuu siinayaa xarunta caafimaadka wargelin qoraal ah oo ku aaddan xad-gudubka ay gashay marka uu helo warbixinta baaritaanka oo faahfaahinaysa in xarunta caafimaad aysan fulin shuruudaha ama ay bixiso adeegyo dhaafsan heerka rukhsadda la siiyey.

3. Rugta caafimaad marka ay hesho wargelinta ku tilmaaman Faqradda (2), waxay muddo todobo maalmood gudahood ah u soo gudbinaysaa diiwaan-hayaha qorshaheeda sixitaanka xad-gudubka oo faahfaahinaya jadwal taariikhaysan oo lagu dhammeystirayo sixitaanka xad-gudubka ay gashay.
4. Rugta caafimaad marka ay soo gudbiso qorshaha sixitaanka sida ku xusan Faqradda (3) uuna oggolaado diiwaan-hayuhu, waxay dhaqan-gelinaysaa jadwalka uu ka kooban yahay qorshahaasi.
5. Haddii uu Diiwaan-hayuhu ku qanci-waayo qorshaha sixitaanka la noqonayaa rukhsadda rugta caafimaad, wuxuuna amrayaa xiritaanka rugta.
6. Goluhu haddii uu ku qanco in xad-gudubka lagu helay xarunta caafimaadka uu khatar weyn ku yahay caafimaadka bulshada, wuxuu isla markiiba xirayaa xarunta kalana noqonayaa rukhsadda.

## QODOBKA 41aad
## Ansixinta Xarun Waxbarasho Caafimaad

Xarun waxbarasho caafimaad kama bixin karto Soomaaliya waxbarasho caafimaad nooc kasta oo ay tahay kaasoo ujeeddadiisu tahay in loo tababaro qofka ka hawl-geliya mihnad caafimaad ama uu qabto hawl kale oo la xariirta baaris caafimaad, daaweyn, adeeg, iwm, sida:

1. Farmashiye, ama ka-hortaga cudurada, haddii xarunta waxbarasho aysan ahayn mid uu ansixiyey Goluhu.
2. Xarun kasta oo doonaysa in ay bixiso waxbarasho ama tababarid qeybo la xiriira caafimaadka sida ku tixraacan Faqradda (1) waa in codsi u soo gudbisataa Golaha ka hor inta aysan bilaabin waxbarashada ama tababarka.
3. Codsiga ku salaysan Faqradda (2) waa in ay wehliyaan:
    - b) Faahfaahinta iyo caddeymaha la xiriira waxbarashadaas, ama barnaamijyada tababarada; iyo
    - t) Bixinta khidmadda looga baahan yahay.

4. Kaddib tixgelinta codsiga, hubinta caddeymaha iyo faahfaahinta ku xusan Faqradda (3), Goluhu wuxuu awoodaa:

    b) In uu bixiyo oggolaanshaha; ama

    t) In uu diido oggolaanshaha.

5. Marka Goluhu uu qaato go`aanka, diiwaan-hayuhu waa in:

    b) Uu ku wargeliyaa xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah go’aan kasta oo lagu gaaray si waafaqsan Faqradda (4);

    t) Uu siiyaa shahaadada ansixinta xarunta waxbarashada caafimaadka ee codsigeedii la oggolaaday.

    J) Uu diiwaanka geliyo faahfaahinta oggolaanshaha ee ku tilmaaman Faqradda (b); iyo

    x) Uu ku wargeliyo xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah, haddii oggolaanshaha loo diiday iyo sababaha keenay diidmada.

6. Ansixinta lagu bixiyey si waafaqsan Faqradda (4) (b), oo ay wehliso shuruudaha lugu ansixiyey, waxay xaruntu u dhaqan-gelinaysaa si hufan oo waafaqsan shuruudihii lagu bixiyey muddada xaruntaasi ay shaqaynayso.

7. Goluhu wuxuu magacaabi karaa baarayaal waqtiyo  kala duwan, si ay:

    b) U baaraan shuruudaha uu dejiyey Goluhu si waafaqsan Faqradda (5) ee xarumaha waxbarasho caafimaad si haboon loo fuliyey; iyo

    t) Warbixin u siiyaan Golaha natiijooyinka warbixinta baaritaanka iyo waxa lagu soo gunaanaday.

8. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu ka laabtao oggolaasho uu horey u bixiyey si qoraal ah taas waafaqsan Faqradda (4) (b), haddii ay u caddaato, in xaruntaas waxbarasho ay ku guul-daraysatay in ay dhaqan-geliso shuruudaha si waafaqsan faqrdadda (5) kaddib marka xarunta waxbarasho la siiyo fursad lagu dhegaysto.

9. Diiwaan-hayuhu waa in uu ku wargeliyaa si qoraal ah xarunta waxbarasho oo ay khusayso go’aan kasta ee Goluhu gaaro si waafaqsan Faqradda (8).

10. Xarunta waxbarasho ee ku tilmaaman Faqradda (8) waa in muddo 30 (soddon) maalmood gudahood u soo celisaa Golaha shahaadada ansixinta laga bilaabo taariikhda wargelinta.

11. Diiwaan-hayuhu waa in uu:

    b) Baabi'iyaa shahaadada ansixinta ee horay loo siiyey xarunta waxbarashada caafimaadka; iyo

    t) Geliyaa diiwaanka macluumaadka baabi`inta shahaadadaas.

12. Xarun kasta ee waxbarasho caafimaad oo mas`uuliyiinteedu ku guul-daraystaan in ay dhaqan-geliyaan si waafaqsan Faqradaha (1) iyo (6) waxay gelayaan xad-gudub, haddii lagu helana waxay mutaysanaysaan ganaax lacageed oo aan ka badnayn Saddex Kun Doollarka Maraykanka (US$3,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn laba sanadood, ama labadaba. Sidoo kalena xaruntaasi waxaa laga joojinayaa adeegga waxbarashada caafimaadka.

## QODOBKA 42aad
## Ansixinta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

1. Xarunta waxbarasho ee fulinaysa tababar-mihnadeed caafimaad oo cusub waa in ay u soo gudbisaa Golaha codsiga ansixinta barnaamijka ka hor bilowga tababarka. Dhammaan barnaamijyada tababar ee hore u jiray waxaa laga rabaa in ansixin looga helo Golaha.
2. Goluhu wuxuu go`aaminayaa kaddib marka si qoto-dheer u baaro barnaamijka tababar ee la soo jeediyey, in uu ansixiyo haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha saldhigga u ah Xeerkan, ama uu diido hadduu ku qanci-waayo.
3. Goluhu, ma oggolaanayo, haddii xarun tababar sameyso tababar aan lagu ansixin si waafaqsan Xeerkan, shahaadooyinka tababarkaasi lagu qaato ma noqonayaan kuwo taabo-gal ah oo la aqoonsan yahay.
4. Xarun waxbarasho caafimaad ma bixin karto tababar la xiriira caafimaadka oo loogu diyaarinayo arday mihnado caafimaad, haddii uusan Goluhu hore u ansixin barnaamijkaas.
5. Xarunta waxbarasho ee ku xad-gudubta Faqradda (4), hawl-wadeenadeedu waxay gelayaan

xad-gudub ay ku mutaysanayaan ganaax lacageed oo aan ka badnayn Laba Kun Doolarka Martaykanka (US$2,000) ama xabsi gaaraya hal sano, ama labadaba. Sidoo kale, xeerkani uma oggolaanayo in xaruntaasi ka hawl-gasho adeeg waxbarasho caafimaad.

## QODOBKA 43aad
## Qiimeynta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

Goluhu wuxuu qiimeynayaa barnaamijyada ay qaban doonaan xarumaha lagu barto mihnadaha caafimaadka ee kala duwan iyadoo sharci ahaan laga eegayo arrimahaan soo socda:

1. Muddada barnaamijka tababarka uu soconayo;
2. Shuruudaha uu Goluhu ku aqoonsanayo barnaamijkaasi tababar ee gaarka ah;
3. Heerarka ugu yar ee lagu aqbali karo in barnaamijka tababarka uu soo saaro Mihnadleyaal caafimaad oo loo diiwaan-gelin karo Mihnadle caafimaad ahaan.
4. Hawlaha looga baahan yahay in uu yeesho barnaamijka tababarka, sida manhajka wax lagu barayo oo tayeysan, shahaadooyinka aqooneed ee hawl-wadeennada kulliyadda, qalabka muhimka u ah tayada barnaamijkaas waxbarasho iyo hanaanka shaqaalaynta hawl-wadeennada kulliyadda.

## QODOBKA 44aad
## Dib-u-eegidda Barnaamijta Waxbarasho oo Horay loo Ansixiyey

1. Goluhu wuxuu dib u eegayaa dhammaan barnaamijyada tababar ee horay loo ansixiyey sanad walba mar laga bilaabo marka oggolaanshaha kowaad la siiyey. Arrintani waxay si gaar ah tixgelin u siineysaa heerka waxqabad ee hawl-waddeenada ka soo qalin jabiyey barnaamijyadaas tababar.
2. Goluhu wuxuu ka noqon karaa oggolaanshaha barnaamij tababar, marka ay u caddaato in barnaamijka tababar uusan hadda kaddib la jaan-qaadi karin shuuruudaha Xeerkan, ama barnaamijka tababar uu si is-daba-joog ah u buuxin waayo ama ka hooseeyo heerarka looga baahan yahay barnaamijkaas.

## QODOBKA 45aad
## Ansixinta Adeeg Daryeel Caafimaad

1. Xarunta bixisa adeegyo caafimaad oo kala duwan ama soo kordhisa adeeg cusub waxay Golaha ka soo codsanaysaa in loo ansixiyo adeegyadaasi si waafaqsan xeerkan iyadoo bixinaysa khidmadda looga baahan yahay.
2. Kaddib helitaanka codsiga ku tilmaaman Faqradda (1), Goluhu wuxuuu u dirayaa baare xarunta caafimaad si loo soo hubiyo in xaruntaasi ay buuxisay shuruudihii looga baahnaa in la ansixiyo adeeggaas.
3. Golaha marka uu ku qanco in rugta caafimaad ay buuxisay shuruudaha ansixinta, wuxuu siinayaa xaruntaas ansixin muddo hal sano ah.
4. Golaha wuxuu ku bixinayaa ansixinta adeegga daryeel shuruudaha u degsan oo khuseeya:
   - b. Nooca adeegga caafimaad ee la bixinayo;
   - t. Aqoonta iyo khibrada Mihnadleyaasha bixinya adeegga;
   - j. Qalabka iyo aaladaha la adeegsanayo;
   - x. Habraacyada daweynta ama qalliinka;
   - kh. Heerka rukhsadda xarunta caafimaad; iyo
   - d. Tababarida Mihnadleyaasha ka qeyb qaaddanaya bixinta adeeggaas.
5. Goluhu ma siinayo xarunta caafimaad ansixin haddii adeegga caafimaad uu xumaan iyo liidnimo u keenayo bukaanka iyo hannaanka daryeelka caafimaadka.
6. Goluhu haddii uu diido codsiga ansixinta wuxuu si qoraal ah ku wargelinayaa xarunta caafimaad isagoo qeexaya sababaha diidmada.
7. Adeegga caafimaad ee ku cusub Soomaaliya marka uu soo buuxiyo shuruudaha faqrada (4), Goluhu wuxuu siinayaa ansixin kumeel gaar ah oo mudadiisu tahay saddex bilood,

8. Golaha wuxuu baaritaan iyo qiimeyn qorsheysan ku sameynayaan hannaanka iyo natiijada adeegga cusub ee caafimaad isagoo u xil saaraya khubaro uu soo magacaabay Goluhu, waxayna baarayaan:

    b. Ururinta xogta la xiriirta adeeggaas; iyo

    t. Natiijada uu la kulmayo bukaanka marka uu helo adeeggaas.

9. Golaha wuxuu go`aan ka gaarayaa warbixinta faahfaahsan oo ay soo gudbiyaan khubarada isagoo go`aaminaya in:

    b. Uu sii socdo bixinta adeegga caafimaad ee cusub; iyo

    t. La joojiyo adeegga caafimaad ee cusub.

10. Goluhu haddii uu bixinayo ansixin adeeg caafimaad wuxuu ku meel-marinayaa heerka rukhsadda ee xarunta caafimaad ay mudan tahay.

## QODOBKA 46aad
## Cusbooneysiin Ansixin

1. Ansixinta la siiyey adeeg daryeel walba oo ay bixiyaan xarumaha caafimaad waxaa si joogto ah loo cusboonaysiinayaa laba iyo tobankii (12) biloodba mar.
2. Goluhu wuxuu weydiisan karaa warbixin faahfaahsan iyo xog la xiriirta adeegga caafimaad oo shuruud u noqon karta cusboonaysiinta ansixinta.
3. Goluhu wuxuu dalbanayaa in baaritaano lagu sameeyo adeegyada caafimaadka oo dhan si loo hubiyo in si joogto ah loo dhaqan-geliyey shuruudihii loo baahnaa.
4. Haddii adeegga caafimaad uu soo buuxin waayo shuruudaha cusbooneysiinta ama aan laga helin xarunta caafimaad warbixin iyo xog faahfaahsan, Goluhu wuxuu joojinayaa cusbooneysiita ansixinta adeeggaas.

## QODOBKA 47aad
## Kala-noqosho Ansixin

Marka xarunta caafimaad ay ku xad-gudubto shuruudaha ansixinta, Goluhu wuxuu kala noqonayaa ansixinta, si qoraal ahna ugu wargelinayaa cidda ay khuseyso:

1. Marka ay dhaqan-gelayso kala-noqoshada ansixinta ee adeegga caafimaad.
2. Lama oggola in xaruntaasi ay sii bixiso adeeggaasi, iyadoo aan dib u helin ansixin dambe.

## QODOBKA 48aad
## Shahaadooyinka Waxbarasho ee Shisheeye

1. Shahaadooyinka Mihnadleyaasha caafimaad ee shisheeye, wuxuu Goluhu tixgelinayaa haddii:
    - b. Lagu bixiyey Af-Ingiriisi ama Af-Carabi;
    - t. Ay ka wadato tasdiiqin iyo shaabad wasaaradaha tacliinta sare iyo arrimaha dibadda ee dalka bixiyey shahaadada;
    - j. Ay ka wadato tasdiiqin iyo shaabbadayn Safaaradda Soomaaliya u fadhisa dalka shahaadada bixiyey; iyo
    - x. Tasdiiqin ay bixisay Wasaaradda Hidaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya ay ku sugayso in shahaadada tahay mid meel-mar ah.
2. Haddii ay dhacdo in shahaadada lagu bixiyey luqado kale oo aan ahayn Ingiriis iyo Carabi, waa in lagu turjumaa luqadaha ingiriisiga ama carabiga isla markaasna la waafajiyaa shuruudaha sare ku tilmaaman faqrada (1).

## QODOBKA 49aad
## Aqoonsiga Ururrada Mihnadleyaasha Caafimaadka

Xeerkani wuxuu aqoonsanayaa dhammaan ururrada Mihnadleyaasha caafimaadka ee kala duwan oo ay leeyihiin mihnadleyaal caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii ay buuxiyaan shuruudahan soo socda:

b. Xubnaha Ururka aysan ka yarayn toban iyo kow (11) xubnood;

t. In ururku leeyahay dastuur shaqeynaya oo qeexaya xuquuqda, xilalka, xubnaha iyo sidoo kale muujinaya himilooyinkiisa, qaab-dhismeedka ururka iyo xeerar lagu nidaaminayo anshaxa Mihnadleyaasha xubnaha ka ah ururka;

j. In nuqulka dastuurka loo soo gudbiyo Golaha; iyo

x. In shahaadooyinka xubnaha ururka ay si toos ah ula xiriiraan mihnadda ururka caafimaadka ee ay kamidka yihiin.

## QODOBKA 50aad
## Xayeysiin

1. Qofna ma xayeysiin karo adeeg caafimaad haddii uu yahay mid ku saleysan:

    b) Been, dhagar ama u eg marin-habaabin;

    t) Bixiya hadiyad, qiimo-dhimis ama ka-dhaadhicin lagu soo jiidanayo qof si uu u isticmaalo adeegga caafimaad, haddii aysan xayeysiintu qeexayn qodobbada iyo shuruudaha xayeysiintaas;

    j) Adeegsada caddeymo looga gol leeyahay marin-habaabin ku aaddan ka ganacsiga adeegga caafimaadka;

    x) Abuuraya rajooyin dhalanteed ah oo la xariira dhiirri-gelin adeeg ama daaweyn aan waxtar lahayn; ama

    Kh) Toos ama dadab u dhiirri-gelinaya kala-saarid la’aanta baaritaanka, daweynta, iyo takhasusyada mihnadda caafimaadka.

2. Haddii lagu xad-gudbo habraacyada xayeysiinta isla markaana lagu helo dambigaas, waxaa qofka ama xarunta caafimad ay mutaysanaysaa ganaax:

    b) Haddii uu shakhsi yahay— US$1,000; ama

    t) Haddii ay tahay xarun caafimaad — US$2,000.

3. Qofna kuma galo xad-gudub lid ku ah Faqradda (1) haddii uu ganacsigiisa qeyb ka yahay daabicid ama faafin xayeysiin ay hay’ad ama qof kale leeyahay.

## QODOBKA 51aad
## Ilaalinta Hor-gelin Magac

1. Sida uu qabo Xeerkani, cidna ma adeegsan karto hor-gelin magac aysan sharci u lahayn sida “Takhtar”, ayadoo dhammaystiran ama la soo gaabiyey, ama wax u dhigma ee AF kale, ama eray kasta oo leh qeexid guud oo ku tusinaya daryeel caafimaad oo la siiyo shakhsiyaad ku sugan Soomaaliya.
2. Qof aan ahayn takhtar caafimaad ama mid ilko, waa in uusan:
   (b) U hawl gelin sidii takhtar caafimaad ama mid ilko, sidoo kalena aan loo shaqaaleysiin adeeg-bixiye daryeel caafimaad; iyo
   (t) Qaban hawlo caafimaad oo dadku u qaadan karaan in qofkaasi yahay takhtar caafimaad ama mid ilko.
3. Qof aan ahayn Mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan oo si ogaal ama xil-kasnimo-xumo ah:
   b) U qaata ama adeegsada mansab ah “Mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan”; ama
   t) U qaata ama u adeegsada mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray, calaamad ama qeexid muujinaysa in uu si sharci ah uga hawl-galo mihnad caafimaad.
4. Qofka ku xad-gudba Faqraddaha (1), (2) iyo (3) wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, marka lagu helo dambigaas, ganaax lacageed oo aan ka badnayn Laba Kun Dollarka Maraykan ah (US$2,000) ama xabsi aan ka badnayn laba sanadood, ama labadaba.
5. Qof ama rug caafimaad ma hawl-gelin karaan ruux aan lagu diiwaan-gelin Mihnadle caafimaad sida uu qabo Xeerkani. Haddii ay ku xad-gudbaanna waxay mutaysanayaan ciqaabo gaaraya ugu badnaan:
   b) Haddii uu yahay shakhsi— US$1,500; ama
   t) Haddii ay xarun tahay— US$2,500.
6. Mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan looma oggola in magaciisa uu ku hawl-galo ama xaruntiisa uu ka hawl-geliyo qof kale oo aan ahayn Mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan. Ciddii ku xad-gudubta qodobkan waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn Kun

Dollarka Maraykanka ah (US$1,000) ama xabsi muddo aan ka badnayn laba sanadood, ama labadaba.

7. Xeerkani kama hor-istaagayo in lagu tababaro xarumaha caafimaadka ardayda ujeedadoodu tahay in ay kordhistaan aqoontooda si ay u helaan shahaado diiwaan-gelin haddii ay si toos ah u kormeerayaan Mihnadleyaal leh aqoon sare oo diiwaan-gashan lana ilaalinayo habraaca tababarrada uu Goluhu dejiyey.

## QODOBKA 52aad
## Xakamaynta Adeegsiga Mansabyada Takhasusle

1. Qof aan ahayn hawl-waadeen caafimaad oo takhsusle ah waa in uusan si oggaal ama xil-kasnimo-xumo ah:
    - b) U qaadan ama u adeegsan mansabka "Mihnadle Caafimaad Takhasusle"; iyo
    - t) U qaadan ama u adeegsan mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray ama qeexid muujinaysa xaalado in la adeegsanayo ama si cad looga fahmayo:
        - i. Qofku in uu yahay Mihnadle caafimaad takhasusle ah; ama
        - ii. Qofka in awood loo siiyey ama u qalmo in uu ka hawl-galo takhasus gaar ah.
2. Ciddii ku xad-gudbta qodobkan waxay mutaysanaysaa ciqaabaha soo socda:
    - b) Haddii uu shakhsi yahay— US$1,500; ama
    - t) Haddii ay xarun tahay— US$3,000.

## QODOBKA 53aad
## Xeer-hoosaadyo iyo Xeer-nidaamiyeyaal

Sida uu qabo Xeerkan, Goluhu wuxuu soo saari karaa xeer hoosaadyo ama xeer nidaamiyeyaal saameynaya baaxadda caafimaad ee kala duwan sida xarumaha waxbarashada, rugaha, Mihnadleyaasha, iyo ururrada caafimaadka, xeer-hoosaadyadan waxaa loo adeegsanayaa meelaha soo socda:

- b. Mihnadleyaasha caafimaad ee leh diiwaan-gelin iyo rukhsad;
- t. Rugaha adeegyada caafimaad;
- j. Xarumaha waxbarashada caafimaad;
- x. Cilmi barista caafimaadka ee dalka; iyo
- Kh. Ururada mihnadaha caafimaad ee la aqoonsan yahay.

## QODOBKA 54aad
## Kala-diridda Golaha

1. Dawladda Soomaaliya way kala-diri kartaa Golaha (GMCQ) haddii uu ku guul-daraysto gudashada awoodaha loo idmaday si waafaqsan Xeerkan ama shuruucda ku lifaaqan Xeerkan.
2. Kaddib marka la kala diro Golaha si waafaqsan Faqradda (1), Dawladda Soomaaliya waxay la wareegaysaa xisaabta iyo hantida kale ee Golaha, sidoo kale waxay hakinaysaa dhismaha Gole kale, waxayna hirgelin kartaa dhammaan awoodaha iyo hawlaha ku xusan xeerka u degsanaa Golaha la kala diray.
3. Dawladda Soomaaliya waxay magacaabaysaa guddi ku-meel-gaar ah oo ka hawl-gala fulinta awoodaha iyo hawlaha ku xusan xeerka GMCQ.
4. Dawladdu waxay dhisaysaa Gole cusub si waafaqsan faqradda (2) mudo saddex bilood gudahood ah marka la kala diro Golaha si waafaqsan Faqradda (1).
5. Dawladdu waxay ku wareejinaysaa Golaha cusub xisaabta iyo hantida lagala wareegay Golihii la kala diray si waafaqsan Faqradda (2) marka la dhammeystiro dhismihiisa.

## QODOBKA 55$^{aad}$
## Xarunta Golaha, Xafiisyada Gobolada iyo Degmooyinka

1. Xarunta Golaha GMCQ waa Magaalada Muqdisho oo ah Magaalo-madaxda Dalka Soomaaliya sida uu qabo Dastuurka Soomaaliya.
2. Goluhu wuxuu xafiisyo heer dawlad-goboleed iyo degmo ku yeelan karaa magaalooyinka iyo degmooyinka uu go'aamiyo Golahu.
3. Xafiiska gobolka ama degmada ee Golaha GMCQ waxaa loo magacaabayaa saraakiil dawladeed oo uu meel-mariyo Wasiirka Caafimaadka & Daryeelka Bulshada si waafaqsan Xeerkan.
4. Xafiisyada gobolada iyo degmooyinka waxay fulinayaan shaqooyinka uu u idmado Goluhu.

## QODOBKA 56$^{aad}$
## Wax-ka-beddelid Xeer

**1.** Xeerkan wax-ka-bedelid ama dib-u-habeyn waxaa ku sameyn kara aqlabiyadda xubnaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) oo xilligaas goob joogga ka ah kulanka caadiga ah ee Golaha.

**2.** Wargelin qoraal ah oo ku saabsan soo-jeedinta wax-ka-bedelidda xeerkan waa in loo gudbiyaa Xubnaha, la-wadaageyaasha iyo xariir-wadaagga ugu yaraan labo toddobaad ka hor inta shirka uusan qabsoomin iyadoo la hubinayo in wax-ka-bedelidda aysan ka hor-imaanayn shuruucda iyo xeerarka u degsan dalka.

**3.** Xeerkaan waxaa dib-u-eegid lagu sameyn karaa labadii (2) sanaba mar haddii Golulu isla oggolaado muddooyinka hore ee dhaqan-galka xeerkan, kaddibna waxaa laga dhigi karaa 3dii sanaba mar.

## QODOBKA 57aad
## Racfaanno

Ruuxii aan ku qanacsanayn go'aan ama amar uu soo saaray Golaha GMCQ ee ku salaysan Xeerkan, wuxuu racfaan u qoran karaa Maxkamadda awoodda u leh muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, laga bilaabo taariikhda uu soo baxay go'aankaas ama amarkaas.

## QODOBKA 58aad
## Warbixin-sanadeed

Dhammaadka sanad kasta, gaar ahaan 3da bilood ee ugu dambeysa sanadka (Oktoobar, Nofeembar ama Diseembar) Guddoomiyaha Golaha waa in uu u gudbiyaa warbixin-sannadeedka Golaha (GMCQ), Wasaaradda Caafimaadka (WC) iyo Guddiga Arrimaha Bulshadda ee Barlamaanka Federaalka..

## QODOBKA 59aad
## Joojin Mihnad Caafimaad

Hal sano kaddib marka uu dhaqan-galo Xeerkani, ma jiri doono ruux aan diiwaan-gashanayn ama aan haysan rukhsad hawl-gal ee mihnad caafimaad ama xarun adeeg caafimaad ama waxbarasho in ay ka hawl-galaan si toos ah ama si dadban Dalka Soomaaliya.

## QODOBKA 60aad
## Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey dhammaan wixii sharci ah oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.

## QODOBKA 61aad
## Dhaqan-gal

Xeerkan oo hirgelintiisa ay u xilsaaran tahay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## QODOBKA 62aad
## Qeexid

Xeerkan gudihiisa, erayada hoos wuxuu mid walba yeelanayaa qeexidda ku hor qoran:

| ERAY | Qeexid |
|---|---|
| **Golaha** | Waxaa loola jeedaa Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ). |
| **Xeer-nidaamin** | Waxaa loola jeedaa dhawridda wax-qabadka ama hab-socodyada ku yimaada xeerar iyo habraacyo uu soo saaray Goluhu. |
| **Ansixin** | Waxaa loola jeedaa xaqiijinta taabbo-galnimo, awoodda, ama waxtarnimada machad tababarid caafimaad ama rug caafimaad oo la meel-mariyey. |
| **Karti Mihnadeed** | Waxaa loola jeedaa awoodda hawl-wadeen caafimaad uu ku abuuri karo tayo mihnad, aqooneed, mihnad,iyo mabaadi’ loo baahan yahay in ay fuliyaan mihnad ku aaddan hawl gaar ah ee dhammaan qorshooyinka xaaladaha iyo hawl-galka. |
| **Xarumaha Waxbarasho Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa Jaamacadaha, Machadyada, Kulliyadaha, Dugsiyada iyo Xarumaha ku hawlan tababaridda qeybo gaar ah ee la xiriira hawlaha caafimaad ama qeyb kasta oo ku lug leh daawada. |
| **Mihnad** | Waxaa loola jeedaa gacan-ku-hayn shaqo xilli dheer ee barasho gaar ahaaneed iyo shahaado aqoon toos ah oo lagu qaatay muddo waqtiyeysan. |
| **Mihnadle Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa ruux leh shahaado aqooneed oo uu ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay oo diiwaan-gashan lehna rukhsad uu ku qabto mihnad qeexan ee dhanka daryeelka caafimaadka oo ka tirsan qeybaha caafimaadka. |
| **Shahaado Mihnadle** | Waxaa loola jeedaa marag-kac rasmi ah iyo dhab ahaansho leh oo caddeynaya in mihnadle caafimaad si guul ah u dhammeystay barnaamij waxbarasho uu ku qaatay xarun |

| | |
|---|---|
| **Caafimaad** | waxbarasho caafimaad oo la aqoonsan yahay. |
| **Mihnadle Caafimaad ee Shisheeye** | Waxaa loola jeedaa qof shisheeye ah ee shahaadooyinka aqooneed ee ruux aan Soomaali ahayn ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay. |
| **Shahaado Mihnad Caafimaad ee Shisheeye** | Waxaa loola jeedaa shahaadooyin aqooneed oo uu bixiyey xarun waxbarasho caafimaad ee shisheeye oo la aqoonsan yahay. |
| **Anshax-xumo Mihnadle Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa fal sharci-darro, anshax-xumo, ama meel-uga-dhac heerarka mihnadda caafimaad oo lid ku ah habraacyada xuquuqda adeegyada caafimaad. |
| **Xil-gudasho-xumo hawl caafimaad** | Waxaa loola jeedaa jebin xil daryeel caafimaad ee mihnadlaha ka saaran bukaanka, taas oo ay ka dhalato waxyeello soo gaarta bukaanka. |
| **Anshaxa Mihnadda Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa mabaadi'da dhawrta ama saameysa anshaxa mihnadlaha caafimaad ee adeeg-siinta bukaanka. |
| **Isku-filnaansho** | Waxaa loola jeedaa bukaanka dhimmir ahaan fayo-qabka ah oo leh karti xusuus iyo qiimeyn warbixin la siiyey inta lagu guda jiro baarista iyo daaweynta, si uu u qaato go'aan maan-gal ah iyo lahaansho isku-filnaansho, go'aan-qaadasho iyo in loo tixgeliyo in uu yahay ruux awood leh. |
| **Isku-filane** | Waxaa loola jeedaa in bukaanku leeyahay awood go'aan-qaadasho. |
| **Oggolaansho Xor ah** | Waxaa loola jeedaa oggolaansho xor ah (oo aan laysku qasbin oo uu bixiyey bukaan isku-filan oo la siiyey macluumaad buuxa oo ku aaddan habraaca daawada ee isaga khuseeya. |
| **Oggolaansho Wakiil** | Waxaa loola jeedaa oggolaansho laga helay qof ka wakiil ah ruux aan isku-filnayn ha-ahaado waayeel, carruur ama aad u xanuunsan. |

| | |
|---|---|
| **Kala-soocitaanka Mihnadeed** | Waxaa loola jeedaa kala-caddeynta iyo xaqiijinta shahaadooyinka aqooneed, waayo-arragnimo, iyo waxyaabaha la xiriira si loo hubiyo in ugu yaraan heerarka looga baahan yahay qeybta caafimaad ee khusaysa hawl-galkan loo fuliyey si hab-sami leh. |
| **Qiimeyn Mihnadeed** | Waxaa loola jeedaa habraaca uu dejiyey Goluhu si uu u go'aamiyo awoodda xil-gudasho iyo mihnad oo ay wehliso heerka aqoonta iyo mihnadda ee codsadaha. |
| **Xarumaha Adeegga Caafimaadka** | Waxaa loola jeedaa xarumaha guud iyo kuwa gaarka ah ee laga bixiyo adeegyada caafimaad ee baarista, daaweynta, ka-hortagga, baxnaaninta ama laga qeybiyo walxaha daawada, qalabka kaabayaasha iyo aaladaha. |
| **Xarumaha Adeegyo Caafimaad ee Guud** | Waxaa loola jeedaa xarun shaqaynaysa ee u furan dadweynaha xilli kasta, taas oo bixisa daryeel caafimaad ee ku habboon heerka loogu talo-galay xaruntaas. |
| **Diiwaan-gelin** | Waxaa loola jeedaa hab-socodka diiwaan-gelineed ee mihnadle caafimaad oo soo dhammeystiray shuruudihii uu uga baahnaa Goluhu si uu u bixiyo adeegyo gaar ah oo si rasmi ah looga diiwaan-geliyo diiwaanka uu gacanta ku hayo Golaha. |
| **Dib-u-diiwaan-gelin** | Waxaa loola jeeda dib u diiwaan-gelinta shahaadooyin dheeraad oo Goluhu aqoonsan yahay ee uu la yimaado Mihnadle caafimaad oo horay u diiwaan-gashanaa. |
| **Cusboonaysiin Diiwaan-gelin** | Waxaa loola jeedaa cusboonaysiinta macluumaadka Mihnadle caafimaad iyo ku-hawlanaanshihiisa in uu sii wato hawl-galkiisa, tababarka iyo barnaamijyada waxbarasho kaddib marka ay dhammaato muddada diiwaan-gelinta. |
| **Rukhsad** | Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha uu bixiyey Golaha, una oggolaanaya rukhsadlaha in uu uga hawl-galo si sharci ah qeyb gaar ah ee caafimaad oo isaga/iyada rukhsadda loo siiyey. |
| **Dib-u-rukhsad-siin** | Waxaa loola jeedaa cusboonaysiinta rukhsadda hawl-gal kaddib markay dhacdo. |
| **Bah-wadaag Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa mihnadaha daryeelka caafimaad ee ka baxsan daawada. |